Halgankii Ummada

&

Hamigii Lixle

(IHUN)

Bahda Mareegta Farshaxan
Oktoobar 17, 2009

"*Ma maanta ayaan odhan karayaa Lixle, Kood-buur, iyo Axmed-dhagax way iska dhinteen? Ma awoodi karno in aynu sidaa nidhaahno. Ma maanta ayaa laga saari karayaa halgankii ummaddani lahayd waxbarashadii, waannu aragnay oo way dhacday. Wasiirka Waxbarashada aad baan uga xumahay da'diisa marka aynu eegno iyo inuu u habrado afar inan oo aynaan garanayn oo UNESCO u shaqeeya oo la dagaalamaya taariikhda Somaliland, halgankii ummadda iyo waxay ummaddani soo martay*".

Sh.Aadan Siiro

Bowdada markii aan ka jabay, boqonka taaggiisa
Habeenkiiba waa i bidhan lahaa, bahalkii cawlnaaye
Raggii buurta dheer igala baxay, beerka ka ogsooni

Bah-Cillaamo goortay dhammaan, iga dul booyaysey
Bah-Sadhaysna "baga" inay i tidhi,beerka ka ogsooni

Ninkii Burunji inuu iga cuno, ii barriidinaayey
Ee aan bar kale ii tarayn, beerka ka ogsooni

Ninkii Belad shisheeye iga jiray, ee soo bixi waayey
Ee in aan bogsado uun jeclaa, beerka ka ogsooni

Laxaad waa badhaadhee hadduu, ii bogsado xooggu
Haddii uu biixiyaha Eebbahay ,isugu kay beego

Abaal badh ah abaal bur ah abaal bur iyo dheeraad ah
Ninba kiisa kaan ugu beddeli, beerka ka ogsooni .

Xaaji Axmed Gabay-Xaddi(IHUN)

Fu,aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan
Oktoobar 17, 2009

Taariikhda oo lagu yaqaan inay rogaalcelis samayso hadaan laga faa'iidaysan ayaa ururkii SNL ee ku guulaystay doorashadu hilmaamay halgankii ummadu u soo martay gobanimada ,islamarkaana ogolaaday inay ka sugaan dad kale qoritaanka taariikhda halgankaa si loogu kaydiyo jiilalka danbe.Hase yeeshee may helin maamuuskii ay mudnaayeen .Sooyaalkii halgankooduna wuxuu ku dhacay god si badheedh aay xukuumadihii kala danbeeyey ugu rideen.Sidaa si la mid ah ayaa hormoodka SNM ee noolina taa mid la mid ah la wadaagaan hormoodkii SNL ,ka dib markay cid kale ka sugeen maamuusid .Waxaase mahad gaar ah leh xubnaha ka tirsan hormoodkii SNM ee si hagar la'aaneed uga qayb qaatey qoraalada ku soo baxa mareegta Farshaxan iyo kuwa u hiladay qoritaanka halgankii dheeraa.

"Qofka aan garan wuxuu mudan yahay cid kale uma garato".

Waxaa si aan gabasho laheyn ugu balbalaadhiyey inaan taasi suurtogalayn gudoomiyaha xarunta manaahijta Cabdilaahi Yaasiin Dirir yidhina: "Idinkoon (xubnihii SNM) waxba haynin ummadana waxba u soo bandhigin, anigu ma qori karo manhajka SNM…"[1]

Hadaba bahda Mareegta Farshaxan sidii caadada u aheyd ayey u tafo xaydatey sugitaanka sooyaalka taariikheed ee halyeyadaa u badheedhay hawlgalid, dabkana saaray intoodii gaarka aheyd ee ay gu'yaal u soo halgamayeen kana hormariyeen danta bulshada oo ay la soo gudboonaatey hagardaamada dawladii habaarqabe ee xukunka gacanta ku haysay markaa iyo kuwii ka horeeyeyba.

Xiligan oo dadweynaha Somaliland u diyaar garoobayaan xuska maalintii qiimaha laheyd ee loo suntay "Shuhadada SNM", waxaa maanka toosani ina tusinayaa inaynu hormoodkii maalintaa la beegsadey dagaal magacawno, kuna darno golaha taalodhiska ee ku xardhan xusuusta inta danaysa horumarka iyo hanaqaadka dalka iyo dadka Somaliland.

Gudoomiyaha gudiga qabanqaabada Xuska Maalinta Shuhaadada SNM mujaahid Quule Cabdi Xasan ooy bahda mareegta hadhwanaagnews ka wareysatey qaabka loo abaabulayo gu'gan iyo wuxuu kaga duwanaanayo kuwii hore wuxuu yidhi: "Doorkan waxaanu wadnaa laba arimood oo ah in horta Quraan loo akhriyo shuhadadaa, iyo in si gaar ah loo xuso lana siiyo bilad sharaf mujaahidiintii ka qayb galay Burco Duuray". Sidaa darteed ayey mareegta farshaxan u hawlgashay siday u sugi laheyd sooyaalkii Mujaahid Lixle oo hogaaminayey dagaalkaa Burco Duuray oo qiimuhuu halganka ku lahaa la garan karo.

Xilli ku beegnayd horaantii sideetamaadkii ayaa waxay aheyd maalin farxad iyo rayrayn leh oo laga dareemayey dhamaan hay'adihii nabad galyada ee dawladii habaarqabto sida qaybtii 26aad , Xaruntii nabad sugida, Xaruntii hangash (Dhabarjabinta), iyo xaruntii saldhiga bilayska ee magaalada Hargeysa, markii uu dhambaal guuleed ku soo dhacey miiskii taliyaha qaybtii 26 aad ee Ina Xaashi "Gaani" oo sheegayey in Maxamed Xaashi Diiriye-Lixle- raadkiisii qabashana arinkiisu yahay.
Waxaa loo gudo galay sidii guushan horta leh loo soo dhaweyn lahaa oo dhabarjab iyo guul daro weyn ku ridi doonta dhaqdhaqaaqii SNM iyo kuwa la garab jooga taageerada hiil iyo hooba leh .

[1] Mar dood ay Idaacada Codka Ameerika u qabatay Cabdilaahi Diiriye iyo Xasan ciise

Wuxuu amray Gaani in si deggan oo wanaagsan loo qaabbilo gogoshana loogu fidiyo dhambaal sidihii iyadoo waliba loo fududaynayey gudashada hawshaa qaran.Dhamaan hay'adihii dawladaa ee nabad galyadu ayaa la wargaliyey in ay la socdaan hawlgalkaa muujinayey kartida iyo waxqabadka hay'adahaa ee gobolada woqooyi, taasi oo si ba'an u curyaamin laheyd yididiiladii laga qabay dhaqdhaqaaqii SNM , keenina laheyd dabargo'ii SNM-ta ee lagu gami'i lahaa.

Hay'adihii nabad galyadu waxay fiiro gaar ahaaneed ku hayeen saraakiishii dawlada ka tirsanaa, ganacsatadii, iyo dhamaan intii haybta la wadaagaysay xubnaha SNM siiba hormoodkii ee loo tuhmi karayey taageeradii SNM.Waxay xiligaa wararku si iska dabadhac ah u soo gudbin jireen inuu Maxamed Xaashi "Lixle" si joogto ah u joogo gudaha wadanka, kuna hawlanaa hawlgalyo lagu curyaamin lahaa awoodii dawlada, muujina lahaa tayada iyo hawlkarnimada xoogagii SNM. Xilligaa waxaa aad loo tuhunsanaa in qabashada Lixle ay suurtogalin laheyd dabagal lagu sameeyo saraakiil dhawr ah oo uu ka mid ahaa dhame Xayd (Ina ganbadh) oo la filayey inuu la kulmo, una suurtogalin lahaa inuu Lixle falal ka fulin lahaa gudaha dalka.

Maalintaasi markii la gaadhay xilligii guryo fadhiisiga ee u jilbo dhigista qaadka nin waliba u goob raadinayey ayuu dhame Xayd (Ina ganbadh) u dhaqaaqey halkuu maalintaa jaadka la dhacadiidsan lahaa.Guri ku yaalay dhinacaa Xero Awr waxaa ku kulmayey maalintaa rag dhawr ah oo uu ka mid ahaa Cabdiraxmaan Aw Cismaan Ismaaciil (Jawaan), Buraale Cilmi Cumar ahaana dirawaladii ugu da'da waaweynaa, Kheyre,iwm. Dadkaasi dhamaan way is garanayeen aan ka aheyn Buraale Cilmi oo garan la'aa mid ka mid ahaa raggii ku kulmayey meeshaa. Waxaanu Buraale Cilmi si badheedh ah u warsadey halkuu ka socday Kheyre ?. Laysma waalinee waxaa si degan markiiba jawaabta ula booday Cabdiraxmaan Aw Cismaan oo yidhi "waxaa la yidhaa Kheyre oo waa Jibriil Abokor baayac mushtari baana naga dhexeeya ". Intaasi waxay si fiican u qancisay waraystihii waydiinta horta leh la shir yimid aan dareemina wixii ku ladhnaa iyo intii qarsoon ee la socotay warcelintaa.

Dhinaca kale dhamaan hay'adihii iyagoo la gaadhey mijilis qaad u raadintii waxay soo dhaweynta maalintaa farxadeed dhinac wadeen hawlahoodii caadiga ahaa eey ka mid aheyd dabagalka iyo raadinta guryaha lagu qayilaayo maalintaa iyo ka war haynta cida ku qayilaysa meeshaa iyada ah. Halka xaruntii maamulka ama gurigii Gaani laga waday u diyaargarowga iyo soo galbinta "**guushii"** ka midho dhalatey dadaalkii, kartidii , wada shaqeyntii , iyo isku duubnidii dhamaan hay'adahii sirdoonka iyo nabad galyada .Waxaa maalintaa dhamaadkeedii sugi kara la'aa taliyihii qaybta kana fikirayey siduu ugu gudbin lahaa adeerkii oo ahaa madaxweynihii dawladii ee habaarqabe Ina Siyaad Bare.Taasoo uu u arkayey inay u noqonayso noqonayso mid cimri dherer iyo xukun raaga u kordhinaysa maamulkiisii.Isagoo niyadana ku hayey inay taasi u suurtogalinayso arintii aheyd "meeshaad inankaaga dhigato uu baa waxqabadkeegu ku soo gaadhaa ".

Mijiliskii maalintaa fooxa dabka loogu riday in la caleemo saaro waxaa ku soo biiray dhame Xayd. Lays wareysay laysuna gudbi warbixintii haboonayd. Dareeme akhyaartii in la ogaan karo bartilmaameedna noqotay meeshii si hufana laysku waraysay, lagana tabaabushaysay colka ku soo maqan. Rag dhawr ah oo albaabka meel in yar uun ka durugsan joogay ayaa ku hawlanaa inay gudbiyaan warbixintii meesha magaceeda iyo

sarkaalka ay arkeen isagoo sii galayey. Waxaase la yaab laheyd in amar la siiyey raggii dharcada ahaa loona sheegay inay gudaha galaan soona qabqabtaan dhammaan dadkii ku jiray gurigii.

Dadkii waxaa lagu shubay xafiiskii nabad suggida.Wareysi dheer dabadeed Buraale Cilmi Cumar ayaa si la yaableh u yidhi oo haddaad nagu haysataan Lixle ma aragteen maad mar horeba si toos ah noo waydiisaan?.Waxaa ku xigtay askartii oo la soo booday oo mee? Buraale Cilmi Cumar ayaa si badheedh ah u qirtay inuu arkay Lixle, walibana siiyey qaad,markaana ogaa halkii uu joogay.Fariintaasi ayaa mudatay inay xukuumaddii jirtay, siiba qaybihii qaabilsanaa nabadgalyadu, soo dhaweeyeen oo ilaa garaad-laawe Gaani gurigiisa gogol farxadeed maalintaasi u fidiyey.

Buraale wuxuu u horkacay hay'adihii riyaaqsanaa inuu soo tuso halkii uu Lixle maalintaasi ku qayilayey. Waxaa la soo kaxeeyey Lixle.Warbixin layska sii horaysiiyeyna loo gudbi Gaani iyo intii ku xeernayd oo iyaguna ka sii tashanayey sidii ay ka yeeli lahaayeen iyo siday warbixintan ugu gudbin lahaayeen madaxweynihii habaarqabe.

Waxaa la soo galiyey Lixle oo la wado lana horkeenay Gaani.Hase yeeshee waxa lays waydaarsadey hadaladan :

Gaani : Waar mee Lixle ?

Guulwadaashii: Taliye waanagan wadna?

Gaani : (oo xanaaqsan) waar si fiican ii dhageysta oo mee Lixle ?

Guulwadayaashii: (waxay ku jeesteen maxbuuskii guusha loo goglay), waar magacaa?

Maxbuuskii : Lixle ..

Gaani : (oo gartay inaanu Lixluhuu doonayey aheyn) Sii daaya gacan lagu hayuhu ha iska socdee.

Waxaa halkaa ku fashilmay qoomamo iyo ciilna la hoyday dhamaan xubnihii u xilsaarnaa hawshaa oo ninkii naaneystiisa Lixle la yidhaaba moodayey Lixlaha dawlada wareeriyey ee hadh iyo hurdaba u diiday .Waxay tani ina xasuusinaysaa markii la rabay in la xidho Idaacada Horyaal ee la galay gurigii shaqaalaha idaacadaa,gacantana lagu dhigay agabkii (labtop-kii iwm), hase yeeshee ay gama' li'i ku riday markay idaacadii soo gashay xiligeedii caadiga aheyd 8:00pm…waxaa lays waydiiyey waar sawtaan agabkii ka soo qaadnay siday idaacadu hawada u soo gashay ?. malaha ilaa iminka way raadinayaanee.Hase yeeshee aqoon meel kaliya ku wada aroorta iyo itaalkeed iga dheh.

Ku dhawaaqidii ururkii SNM, talaabiddii hormoodkii bulshada, xadhiggii dhalinyaradii UFO, dhagaxtuurkii ardayda, iwm waxay kordhiyeen shakigii iyo kala fogaanshihii dawladii habaarqabto iyo dadweynaha maamulkaa hoos imanayey. Waxaanay xoojiyeen hawlgalkii madhalayska ahaa ee hay'adahii nabad gelyada ee Hangashta, Dabargoynta, Nabad Sugidda, Guul wadayaasha, Koofiyad Casta iwm ay isku dayayeen inay fuliyaan.Hay'adahaasi waxay si dadban iyo si toos ahaaneedba u hoos tagayeen taliyihii

qaybta 26 aad oo isna xidhiidh toos ahaaneed oo joogta ah la lahaa habaarqabe Ina Siyaad. Dhawr shir dabadeed, waxaa hay'adihii nabad galyadu isla garteen in hormoodkii SNM hawlo joogto ah ka wadaan dalka gudihiisa aanay isticmaalaan isgaadhsiin ahaan Antenna-yaasha Raadyawga ee ku yaala gawaadhida Taksilayaasha (taxi) oo aad kor ugu qaadi jiray maalmahaas, muuqaal gadisna ay u adeegsan jireen hormoodkii SNM go'a shaalka ah. Xubnihii hadalhayntoodu ku badnayd inay dalka joogeen waxaa magaciisu soo noqnoqanayey Maxamed Xaashi "Lixle" oo cabsi weyn ku dhaliyey madaxdii hay'adahaas oo ogaa kartidiisa, aqoontiisa milatari, hawl fulintiisa aan si hawlyar loogu curyaamin karayn, iwm. Sidaa darteed waxaa go'aan midaysan laysla qaatey in la dabargooyo jiritaanka go'a shaalka iyo antenna-yaasha. Waxaa xabsiyada dalka loo taxaabay qofkii go' shaal ah wata iyo dirawalkii antenna-ha kor u taaga.

Aragnay dhacdooyinkaa iyo in kaloo badane, waydiinta inooga baahan warcelintu waa halyeyga intaas oo guul ah loo garawsadey, gadhwadeena u noqday dhaqdhaqaaqii SNM, fadhina u diiday dhamaan hay'adihii sooyaalkiisu siduu ahaa? siduuse u hawlgalay? Siduu ugana badbaadey inta qoorgooyo iyo shirqool ee lala beegsadey si loo qabto?

Marxuum Ismaaciil Daa'uud Cigaal oo dhex taagan Cabdillaahi Akar (Bidix) iyo Marxuum Maxamed Xaashi (Lixle)

Wareysiyo badan oo hawlwadeennada mareegta Farshaxan sameeyeen, waxaa ka soo baxey in Mujaahid Lixle intuu dalka gudihiisa joogay ka wadey hawlgalqabadyo intay doonto ka badnayd intuu dhinaca Itoobiya joogay. Siday haddaba ku suurtogasha? Yaase ku kaalmeeyey? …Qoraalkani wuxuu xambaarsan yahay taariikhdii halganka oo lagu sargooyey dadaalkii Mujaahid Maxamed Xaashi Diiriye "Lixle"….

Bahda Mareegta Farshaxan
Oktoobar17,2009

Sooyaalkii Mujaahid Lixle:

Bahda Mareegta Farshaxan
Oktoobar17, 2009

Hadaanan Hadaanan
Hadaanan Gadoodka
Lixloow gu'ga maanta
La soo hadhin guusha
Mujaahid Cali Banfas

"*Markaa, waxaan la yaabay ninka kolkuu dhashay, halkuu ku dhashay, halkuu ku tacliin qaatey iyo halkuu ku dhamaystay intiiba la ogyahay.Halkuu u dhintay ee uu u xabaal-galayna ay halkan tahay [Somaliland], een haddana cidiba xasuusan wayday, ayaa aniga oo da'daas ah aan la fajacsanahay.!!* " Hooyo Canbaro[2]

Dhidib weeyi taariikhdu iyo waayo soo dhaca e
Dhalaankiyo caruurtay u tahay dhaxal u meel yaale
Dhafoor qiiqlayaal iyo cabdow dhuuncas iyo gaade
Iyo baado dhalandhoola oo dhagar u soo xaytay
Dhidar iyo waraabiyo abees diir wax dhilanaysa
Iyo qaar dhac loo soo diroo shayna dhaafaynin
Waatii dhufaysyaday qoteeen loogu soo dhacye
Markuu soodhku dhaashaday markuu dhiigu shalaxbeelay
Markuu qumuca dhiilada sidaa laba dhaclaynaayay
Sida dhool gu' oo da'ay markuu dhibicu heehaabay
Dhab markii dagaal loo galiyo dhiidhi dirirreedka
Dhudi yaa lahaayeey markii lagu dhawaaqaayey
Dharaartaa ninkii maali jiray dhici xaqiisiiye

Mujaahid Cabdiraxmaan Cawl –Baqdaadi-

Gu'gii 1945[kii] waxaa hadal badani ka taagnaa sida gumaysigii ingiriisku ka yeeli lahaa degaanka "Reserve Area" .Waxaa kaloo gumaysigii Ingiriisku ku hawlanaa jeexidii soohdintii u dhaxeysa Somaliland iyo Itoobiya. Jeexida soohdintaa oo dadka qaarkii xilligaa u macnaystay in dhulka daaqsinka ah iyo dhulka degaanka loo kala seeraynayo. Halka dadka qaarkii u arkayeen in waddo toobiye ah loo samaynayo.Laakiin gabayaagii dareenkiisu ka fiirada dheeraa intaas ee la odhan jiray Maxamed Cabdi Aw Xaashi oo isagu ka biyo diiday jeexidaaa kuna cabiray dareenkiisa gabayga ku caan baxey "Qoonsada halkaas waxa ku jira", wuxuuna yidhi:

[2] Wareysi ay waregeyska Ogaal la yeelatay Muj.Lixle hooyadii Canbaro

Qoto iyo Taleexbaa la simay, qaydkan seeraha e

Sidii qaalmo booliya dhulkii waa la qaybsadaye

Isba qiil banaysuu u yimi qoortan dooga lehe

Wuxuu kuu qabtaba daaye wuu idin qalaayaa e

Sin qooreedkan lay dhigay waddadan lay qoqobadeeyay

Haddii aw qushuucdeen berruu qaadan waa imane

Qoonsada halkaa waxa ku jira qabar laxaad weyne

Qunsulkaa la dhigay ceelka Herer qiil kalaa xigiye

Waxba yaanu ii kala qarradhin qoolashaan dego,e

Markuu geed qalloocsamaba waan sii qandhanayaaye

Qayrkay hadday toban yihiin qodob ma riixeene

Qanjo uma lahaadeen halkane qaar ayaa wada,e

Qoqobaha dhexdiinaba marbaysugu qudh beeshaane

Qoonsada halkaa waxa ku jira qabar laxaad weyne

Xilligaa 1945[kii] ayuu wiil ugu dhashay tuulada Go'da weyn oo ka tirsan Gobolka Saaxil aabbo Xaashi Diiriye iyo hooyo Ardo Diiriye Madar .Waxaanay ugu wanqaleen wiilkaa ay dhaleen Maxamed. Maxamed Xaashi wuxuu ugu yaraa shan carruura oo ay dhaleen labadaa waalid, aadna wuu u firfircoonaa. Waxaa Maxamed yaraantiisii xilli ku beegan ilaa markuu ahaa shan jir u suurtogashay in laga kaxeeyo Go'da weyn oo aabihii magaalada Burco kaga daro malcaamad Qur'aanka.

Xilligan uu ku jiray malcaamada ayaa waxaa raacey magaca uu ku caano maalay ee "Lixle". Hooyo Ardo oo uga warantay wargeyska Ogaal ee ka soo baxa Somaliland-na waxay tidhi : "Waxa magaca Lixle u bixiyay macalin dugsigiisii hoose wax ugu dhigi jiray, macalinkaas ayaa sababta uu magacaas ugu bixiyay ay ahayd maalin maalmaha ka mid ah oo ay is dileen lix wiil oo ka mid ahaa ardaydii ay wax wada baranayeen, isla markaana lixdiiba iska celiyay, kolkaas ayuu macallinkaasi kala dhex-galay, waxaanu ogaaday waxa ay isku hayeen, ka dibna macalinkii yidhi 'waar kani waa Lixle... mar haduu lix wiil iska celiyey, halkaas ayuu magaca Lixle kula baxay".

Mujaahid Lixle wuxuu nasiib u yeeshay inuu ka mid noqdo ardeydii wax ka baraneysay dugsiga Sheekh sannadkii 1952[kii]. Wuxuu Maxamed Xaashi ku dhameystay halkaa dugsiga hoose, dhexe iyo kii sareba.

1952 ilaa 1956 Dugsiga Hoose
1956 ilaa 1960 Dugsiga Dhexe
1960 ilaa 1963 Dugsiga Sare

Wuxuu Mujaahid Lixle ahaa ardeydii qalin jabisay 1963[kii] lana wadaagey qalinjabintaa mudanaaysha uu ka mid yahay mujaahid Ciise Curaagte.

Milicsiga degmada Go'da weyn:

Go'da Weyn waa magaalo mudan taariikh u gaar ah. Waa degaan si fudud looga tagi karo magaalooyinka ugu waaweyn wadanka Somaliland. Go'da weyn markaad joogto waxaa dhinaca koonfurta bari kaa qabanaya Burco.Halka dhinaca woqooyi ay ka xigto buurta Gacan Libaax. Haddii aad korto buurtaa Gacan Libaax waxaa kuu muuqanaya xeebtii iyo laamidii Berbera, dhinaca galbeedna waxa kaa qabanaya Hargeysa, iyadoo dhinaca laamiga Berbera ay kaaga muuqato Sheekh.

Waa isla doonasho Illaah iyo aqoon uu Mujaahid Lixle u lahaa degaankee meel aan sidaa uga fogayn ayuu ka furay xaruntii abaabulka ee dhismihii ururka SNM kuna hoosaasiyey dawladii habaarqabto markuu beer ka iibsadey magaalada Dhubato.

Magaalada Hargeysa markaad uga baxdo dhinaca bari (Berbera iyo Burco), waxaad galaysaa tuulooyinka Haleeya, Aw barkhadle, hase yeeshee markaad gaadho Dhubato (waa halkuu mujaahid Lixle beerta halganka ka iibsadey), wadada laamiga ah dhinaca Berberay kugu shubaysaa, haddiise aad raacdo wadada rafka ah een dhisnayn una jeedsato koonfur (midig) uuna mari jiray baskii Bas Gawrac waxay afka kuu saareysaa tuulada Gadh Yuhuud, ka dibna Weeraarta, dabadeetana markaad woqooyi in yar uga leexato Biyo Fadhiisinka, taaso wajiga kuu qabadsiinaysa Deri Maraa oo si fudud kuugu guryo gaynaysa Go'da Weyn. Degaankani waa ku haboon yahay hab dagaaleed dadban waana meel istaraateji ciidameed oo wanaagsan ah.

Waxaa degmadan Go'da Weyn dadka ku caano maalay lagu ladhi jiray magacdooda sida ninka la yidhaa Guray Go'ood.

Markaad joogto Weeraarta waxaa looga leexdaa Cadaadley uuna ku ooli jiray dugsigii sare ee hormoodka wadanka Somaliland soo saarey, hase yeeshee aad u dayacan iminka. Dadka halkaa ka baxey waxaa ka mid ah weriye ummada ee Axmed Xasan "Cawke".

Go'da weyni waxay udub dhexaad u tahay saddex magaalo Berbera, Burco, iyo Hargeysa. Waxaanay ka tirsan tahay gobolka Saaxil iminka. Degmadani waxay bar kulan u tahay Gobolada Togdheer, Saaxil, Oodweyne, iyo Maroodi jeex. Degmada Go'da weyn waxay ka

Bahda Mareegta Farshaxan
Oktoobar 17, 2009

mid noqotay degmooyinkii cusbaa ee Madaxweyne Daahir Riyaale magacaabay bishii Maarso 2008[dii].

Bal aan in yar soo ergisano oon waayo kale dib u jaleecno waa ciidankii dagaalyahanka SNM oo meesha la yidhaahdo Go'da Weyn ugu galay 15 isjiidoo ka mid ahaa ciidankii taliskii Ina Barre halkaana hurda, waxaana dagaalyahanka SNM halkaa kaga biyo beelay baabuurkii ay wateen, iyaga oo ku sugan meel magaalada dacalkeeda ah, balse mujaahid C/Xakiim Maxamed Aaden (Sumuli) iyo mujaahid kale ayaa ku noqday magaalada Go'da Weyn si ay biyo uga soo dhaansadaan.Sheekadoo dhameystirana halkeeda ayeynu ugu tagi ee waa xidhiidhka halgankii iyo degmada Go'da weyn oo maalintaa biyo ugu gargaartay, marin halgameedna noqotay.

Wasiirka Duulista Hawada iyo Gaadiidka Cirka, Cali Maxamed Warran-Cadde oo isaguna xaflad loogu Wan-qalayey degmada Go'da Weyn oo lagu qabtay Buurta Gacan-Libaax ka hadlay ayaa balan qaaday in uu garoon diyaaradeed ka dhisi doono degmada Go'da weyn, isla markaana uu ku caawin doono labada libaax iyo laba faras.

Maanka ku hay:

Hargeysa/Sallaxleynews-Dhisme dugsi sare oo ku yaala degmada Gacan libaax ee Magaalada Hargeysa ayaa Muddo Sannado ah u dayacan Khasaare uu soo gaadhsiiyay Roobab laxaad leh oo ka da'ay Hargeysa Sanadkii 2008, kaasi oo aan ilaa iyo hadda waxba laga qaban. Dugsigan oo ku yaala halkii hore ay u ahaan jirtay Kawaanka Hargeysa (Xero-dhiigta), isla markaana loogu magac daray Wasiirka Duulista Hawada Somaliland Cali Maxamed Waran-cadde sugaya dayactirkii wasiirkaa ayaan ilaa wakhtigan ka suurto gelin in ardayda ka soo baxda fasalada sideedaad ay si caadi ah ugu bilaabaan waxbarashada.

Bahda Mareegta Farshaxan
Oktoobar17,2009

Xoogsi Tagistii:

Bahda Mareegta Farshaxan
Oktoobar17,2009

Markii ay taariikhdu ahayd 1964 waxa uu ka mid noqday lixdii inan ee ugu sareeyay dugsiga Sheekh, waxaana loo qaaday wadanka Ruushka oo uu ka soo bartay Injineernimada siiba taangiyada.

Xilligaa ardeyda ama shaqaalaha la qaadaa waxay tagi jireen meelahan ka mid ahaa wadanka Ruushka :
Ciidamada Cirku : Magaalada Tashkant
Ciidamada Dhulkuna : Magaalada Oddessa , Gobolka Ukrain
Ciidamada Baddu : Magaalada Baku ,gobolka Azerbijaan
Siyaasiiyiinta iyo kacaameynta : Magaalooyinka Lavov iyo Mosko
Dhinaca Dhakaatiirtana: Leningaraad

Markii uu soo dhamaystay waxbarashadaas, waxa uu ku soo noqaday dalka, waxaana markaa madax looga dhigay Xeradii Taangiyada ee Xamar, markii dambena Hargaysa ayuu ku soo noqday, wuxuuna mar kale madax ka noqday warshadii Kabista ee Hargeysa.

Markii laga soo noqday dagaalkii 1977[kii], Waxaa laga badaley wasaarada difaaca, loona magacaabay sarkaal sare inuu ka noqdo wakaalada hargaha iyo saamaha oon wax xidhiidh ah la laheyn aqoontiisii milatarinimo, halka dadka qaarkii tilmaamayaan in xafiiska madaxtooyada ee ina Barre laga hawlgalinayey.Waxaa qaabka sidan ah loo yaqaanay buul dhigis oo ka falcelinaysay in niyada laga dilo laguna kaalmeeyo siduu shaqo ka tagis hor leh ugu hawlgali lahaa.

Mudaba may qaadan garaadkiisa oo sareeyey awgeed inuu jabkan ay dawladii habaarqabto la maaganeyd si togan uga faa'iideeyo dadweynaha degan dhulka iminka la yidhaa Somaliland.Horaantii 1980[kii] wuxuu codsadey shaqo ka tagis aad looga soo dhaweeyey maamulkii dawladii habaarqabto.

Abaabulkii Halgankii SNM:

Bulshada Somaliland waxay xornimadeeda qaadatey 26kii Juun, 1960. Socdaal caadifadi hageyso iyo qiiro shantii Somaliweyn raadis ah darteed laguma nagaan in la quuto midhihii halgankii dheeraaa, waxaase hormood u noqday isdhiibidii SNL. Cismaan Jeele[3] oo ka hadlaya arintaasina wuxuu yidhi: "Horta qolooyinka (Somaliland) wax shurrud ah ooy la yimaadeen majirto waa isa soo dhiibeen uun". Maamuladi kala danbeeyey uma roonayn Somaliland halka saraakiishii dhalinyarada aheyd ee reer Somaliland isku dayeen inqilaab dhicisoobay. Hase yeeshe dawladii habaarqabto ee ina Bare hogaanka u hayey ayaa isku fuuqsatey oo si toos ah u cadeysatey cadaawadaa. Dareenka dadku waxay ku muujiyeen Silsiladii Siinley.

[3] Mar uu u waramayey Aadan Nuux Dhuule oo waydiiyey siday maamulkii 1960 ugu koobeen koonfur uun

Xili ku beegnayd horaantii 1975kii ayaa dawladii habaarqabto shaqo ka erin iyo xadhig ku bilawday aqoonyahanadii iyo shaqaalihii ka soo jeeday dhinaca Somaliland. Mujaahid Maxamed Cabdilaahi Cabsiiye[4] oo ka hadlaya arintaasina wuxuu yidhi : "waxa isla ayaamahaa-1975kii- mar kaliya shaqada laga wada eryay shan iyo todobaatan nin oo u dhashay Somaliland oo isugu jiray Agaasimayaashii Wasaarada Tacliinta iyo Agaasimayaashii wasaaradaha kale, sababta shaqada lagaga eryayna waxay ahayd waa niman waqooyi ka soo jeeda, waxa kale oo uu si weyn uu u diidanaa taliskii kali taliyaha ahaa ee Maxamed Siyaad Barre aqoonta balaadhan ee ay nimankan gobolada Somaliland ka soo jeedaa ee uu shaqada ka eryay ay lahaayeen". Dadka xiligaa laga xayuubiyey xilkay dawlada u hayeen waxaa ka mid ahaa:
- Dube Cali Yare oo maxkamadaha ka soo shaqayn jiray.
- Buurxakabe oo maxkamada sare ee Soomaaliya haysan jiray.

Waxaa murugo iyo qoomamiyo maanqashiyo ciil leh.
Maskax iyo garaad iyo wixii muruqba kaa liita.
Markuu adiga sharaftaad mudnayd kaa maroorsado e
Naftu inay maqnaato iyo inay mahad ku noolaato.
Labadaa mid weeye Maaweelis weeyaan
haddii mid u dhexeeyaaye
Abwaankii Dhoodaan

Xiligan waxaa dhinaca saraakiisha oo uu xidhiidhinayey Mujaahid Maxamed Xaashi "Lixle" ay wadeen shirar qarsoodi ah ooy ku lafogurayaan xaalada dalka iyo sidii wax looga qaban lahaa. Halka dhinaca dibada gaar ahaan Carabahana uu ka socday xidhiidh sidan oo kale ahi .Waxaa la gartay in dhibaato jirto una baahan tahay wax ka qabad midaysan iyo hurid la huro inta mudan ayna si fiican dareenkaa u muujisay silsiladii Siinley.

Mujaahid Maxamed Kaahin oo arintan ka hadlayaana wuxuu yidhi: "Arintaasi waxay qaban qaabadeedu socotay ilaa dhawr iyo todobaatankii, waxaanay ka bilaabantay dibada ka bacdi markii dad farabadan oo madaxdii sare ee dawlada ahaana ambaasador-o, agaasimayaal guud, iwm. Shaqada laga wada eryay qaarna la xidhxidhay, isna dhaqdhaqaaqan ciidamu muu aheyn mid isaguun ku koobanee wuxuu mar walba barbar socday dhaqdhaqaaqaa siyaasiga ahaa ee dibadana ka socday".

Isagoo Mujaahid maxamed Kaahin ka waramaya sida abaabulka iyo xidhiidhku uga jiray gudaha wuxuu yidhi : "Gudaha markaa qaabka uu uga socday wuxuu ahaa: Ciidamada saraakiisha ku jirtaa dhinac bay ka wadeen ,isla markaana waxay xidhiidh toos ah wada lahaayeen siyaasiyiin ku jirtay markaa xukuumada dhisnayd oo iyaguna hawshaa dhinacooga ka jiray.Bacdamaa aanu aheyn saraakiil ciidamada ka tirsan waxaanu u xidhiidhi jirnay qaab qarsoodi ah oo xihdiidhiyayaalna aanu leenahay ,waxaanu ka digtoonaan jirnay inaanu samaysano structure rasmi ah ama qaab dhismeed .. Arintaa raga xidhiidhin jiray waxaa ka mid ahaa engineer Maxamed Xaashi Lixle oo sarkaal kornayl buuxa ahaa, xarunta gaashaandhigana joogay, ahaana hogaanka ciidamada warshadaha iyo Axmed Maxamed Halac oo isna sarkaal sare oo kornayl ciidamada bilayska ahaa".

[4] Wareysi uu ka qaadey Mujaahid Cabdilaahi Cakuse

Isagoo sii wata hadalkiisa wuxuu yidhi mujaahid Maxamed Kaahin: "Waxaa loo xidhiidhi jiray Xamar saraakiisha joogta, Gobolada dhexe saraakiisha joogta, Gobolka woqooyi saraakiisha joogta oo Hargeysa xarun u tahay, Gobolada kale sida Baydhabo saraakiisha joogta".

Waxaa mar kasta dhacda in aan runta laga sheegin xilligii hormoodku damqadeen una qorshaysteen halgan nidaamsan oo hufan.

Mujaahid Ibraahim Maygaag oo arintaa ka hadlayey wuxuu lahaa:"Marka laga hadlayo bilowgii halganka lama odhan karo waa wax sida makhaayad ama dukaan la furayo waqti go'an oo gaar ah bilaabmay. Ha jirto in rasmi ahaan ururkii SNM bishii April 1981 kii 'London' lagaga dhawaaqay. Laakiin colkayagii ilaa bilowgii la socday wuxu u ahaa maraaxil dheer oo isdaba jooga oo marxalad waliba wejigeeda, waajibaadkeeda iyo duruufaheeda gaarka ah leedahay".

Ku dhawaaqidda rasmiga ah waxa ka horreeyey maraaxil dheer oo isugu jiray baraarug, dareen, garasho nooca nidaamkii jiray iyo wixii laga qaban lahaa. Intii dareenku galay si ay u doodaan, wax isu tusaan, isu aaminaan waxay qaadatay waqti dheer oo dhib badan. Isagoo mar kale ka jawaabayey waydiin ku saabsaneyd in abaabulkii iyo dhaqdhaqaaqii SNM uu ka horeeyey dagaalkii 77^{kii} wuxuu sheegay in arintaa unkankeedu ay ka horaysay dagaalkii 77^{kii} uuna ku qiyaasi karayey ilaa 75^{ka} dabayaaqadiisii ilaa 76^{ka} horaantiisii isagoo ku bilawday saraakiil kooban oo Xamar joogtay ".

Waxaa si siman u saamaysay hagardaamada si gaar ah loola doonay degaanka Somaliland iminka ah iyo dadkii ku dhaqnaa.Waxaanay aqoonyahanadii, siyaasiyiintii, ganacsatadii, iwm. si dadban iyo si toos ahba u dareemeen talaabooyinkan cadaalad darada ah ee ay ku talaabsatay dawladii habaarqabto.Waxaanay goosteen dadku inay is abaabulaan.

Horaantii bishii Febraayo, 1978^{kii} Waxaa la badalay gudoomiyihii gobolka woqooyi galbeed oo ahaa Bile Rafle Guuleed , laguna badalay Cumar Salaad Cilmi ka dib markii Dagaalkii 77^{kii} uu ku keenay ciidamadii niyad jab weyn ,ayna jabhadihii la abaabulay ee Bile Rafle taageerada ka haystay dhib xad dhaaf ah u gaysteen dadkii degaanka galbeedka Hargeysa.Cumar Salaad oo ka hadlaya sababtii loo soo badlayna wuxuu yidhi: "kulankii aan dadweynaha la kulmay waxay ii sheegeen in ciidamadii Somali Galbeed iyo qaxootiyadii la hubeeyey ay dhib badan u gaysteen degaanadaa dadkii deganaa, tani waxay nagu khasabtay in dadkii degaankana loo ogolaado in la hubeeyo".

Ka dib ogolaanshahaa ayaa fududeeyey in dadkii degaanku samaystaan awood ciidan oo ka difaacda qaxootigan la hubeeyey laguna magacaabi jiray Jabhadihii Soomaali Galbeed.

Bishii Oogosto 24^{dii},1978^{kii} ayaa laba nin oo ka mid ah odayaasha Geed-baalaadh oo magacayadooda la kala yidhaa Maxamed Aadan Cigaal (wadaad-yare) iyo Cali Cabdi Xasan (Cali kayd) noqdeen ragii u guntaday samaynta jabhad degaankaasi leeyahay, waxaanay ku soo xereeyeen 25kii nin ee ugu horeeyay ee lagu bilaabay jabhadii Afraad xero looga sameeyay Harta Cabdilahi faruur oo 4-5 kilo mitir bari ka xigta magaalad Geed-

Balaadh,kuna taala xadka u dhaxeeya Itoobiya iyo Somaliland, si ay u yeeshaan sumad gaar ah.Waxaana loo bixiyay markaa "jabhada ciidanka diinta Islaamka".

Qabanqaabo iyo waxa la galay hub iyo saanad ururs, waxa hubka laga soo ururiyay qoryo wixii la hayay dadka si loogu tabobaro, xaga saanada iyo cuntada oo muhiim aad u ahayd waxa dadka degaanka loo qaybiyay 17 waaxood ama beelood.

Waxaa lagu qori ritay ama qaybsaday saanad ku filnaata 1000 qof in la soo ururiyo, Degaanka loo qaybiyay in laga soo qaadhaamo raashinka iyo agabka kaleba waxa uu fidsanaa laga bilaabo Geedbalaadh,Gobyarta, Saxatilay, Qabri-hante iyo inta u dhaxaysa, waxa markiiba la yidhi, qayb kasta oo ka mid ah 17-ka beelood ha keenaan, 17 jawaan oo arabikhi ah iyo laba jawaan oo milix ah, oo kayd iyo ku bilowba u noqda jabhada, sida uu sheegay Maxamed Aadan Cigaal "wadaad yare" waxa gacan xoog leh ka gaystay, suurta galinta hawshaa nin ganacsade ahaa oo la odhan jiray Maxamed Khayre Guuleed (IHUN) oo geeriyooday bishii Juun 2000. Intaasi waxa dheeraa muquunada gaar gaarka loo bixinayo oonu dadku waxba xaga danbe ku reebanayn, xanuunka lagu hayo dadka ee kaga imanaya jabhada(jxsg) iyo askarta laajiga degaanka ku ah, ayaa sii dhiirigalinayay inay dadka degaanku jabhadooda hagar la'aan ugu quudhaan wax kasta oo looga baahdo, bulshada noocyadeeda kala duwani uma kala hadhin gacan ka gaysiga hawshaa.

Sidoo kale xiligan waxaa qaybta laga badalay qaybtii 26aad Sarkaal sare Salxaan, laguna badlay Siciid Faarax ooy ina Bare isku dhawaayeen ,inastoo aanu muddo badan xilkaa sii haynin qaabka loo xushay iyo xilku intuu leekaa oo isqaban waayey darteed.

Sida uu sheegay Mujaahid Maxamed C/laahi Cabsiiye ayaa gu'gu markuu ahaa 1979kii ay rag tiradoodu gaadhayso (40 ilaa 50) oo isugu jiray siyaasiga, mutacalinka, baayac-mushtarka iyo noocyada kaleba lahaa isugu yimaadeen magaalada Jeddah. Waxaanay ku shireen guri uu lahaa Cismaan Aadan (Cismaan Indhoole). Gurigaas ay ku shireen waxaa kaloo fadhigaa ka soo qayb galay ergo ka socotay Xamar .Dooda shirka ee habeenkaasina waxay ahayd sidii loogu dhawaaqi lahaa jabhad iyo halkii la tagi lahaa.

Sidoo kale dabayaaqadii bishii Diisambar ee 1979kii waxaa magaalada Hargeysa safar hawleed ku yimid dhagarqabe Ina Cali Samater oo u weheliyo Mujaahid Lixle.Ka sokow hawlahaa dawlada, waxaa u qarsoonayd Mujaahid Lixle abaabulkii iyo xidhiidhintii uu wadey.Wuxuu si qarsoodi ah ula kulmay saraakiishi reer woqooyiga. Kuwa uu la kulmayna waxaa kamid ahaa Mujaahid Cabdisalaan Turki oo isagu uu marka horeba ku soo qoray warshada kabista ee Hargeysa markay ku kulmeen koobihii dagaalka ee 77kii. Mujaahid Cabdisalaan Turki oo kulankaa ka hadlayan wuxuu yidhi: " Wuxuu iiga sheekeeyey halganku halkuu marayo,ina wareystay sidaan diyaar ugu ahey ,isagoo iiga waramaya hawlaha ilaa haatan la qabtay.Hase yeeshee wuxuu ii sheegay inuu noqodkiisa soo diri doono warqad aan ugu anbabaxayo safar hawleed si aanu u yeelano kulan kale, iina sheegay inaan la xidhiidho sarkaal sare mujaahid Ismaaciil Cali Shaxaari".

Sidoo kale xiligan waxaa dib loo soo badalay sarkaal sare Salxaan lagana dhigay inuu noqdo taliyaha ciidamada qaybtii 26aad. Waxaa xiligan Salxaan u suurtogashay inay si fiican isku fahmaan waayeelkii iyo saraakiishii uu soo xushay.Sidaa darteed ayaa Ina Bare oo shir kula yeeshay guriga shaqaalaha ee magaalada Hargeysa odayaasha ka soo jeeda gobolada woqooyi ay ka codsadeen inuu u dalacsiiyo Salxaan . Shirkaa ka dib Salxaan waxaa loo dalacsiiyey General, inkastoo ii Ina Bare si aan qorshaynayn ku sii maray

Bahda Mareegta Farshaxan
Oktoobar17,2009

Dhuusomareen dalacsiiyeyna Cumar Xaaji Masale ooy ood wadaag yihiin si aanu General Salxaan uga sareyn.

Gu'gii 1980[kii] ayaa tilmaan xoogan ku lahaa SNM, aheydna in ay suurtogashey in la dhaariyo madax sare oo ay ka mid ahaayeen Ismaaciil Cali Abokor iyo Cumar Carte Qaalib oo xubno muhiim ka ahaa hawlgadii gudaha ee abaabulkii jabhaddii SNM. Waxaa kaloo Mujaahid Lixle dhaariyey xiligan oo Xamar ugu yimid sidii u qorshaysnayd Mujaahid Cabdisalaan Turki ayna si fiican iskula qaateen u hawlgalida halganka, wada galeena goobo badan oo dagaal sida jabintii Jeelka Madheera.

Muaajid Lixle waxaa isla xiligan taliskii habaarqabto go'aansatey in xilka milatarinmo laga qaado, ka dib markay wax iskuma falayaashii u warameen, iyadooy kaalmaysay aqoonta ay xubnihii xukuumadu u lahaayeen dhiiranaanta, fiirada dheer, iyo dulmi nacaybka uu ku baadisoocnaa Mujaahid maxamed Xaashi Diiriye "Lixle".

Horaantii 1980[kii] Mujaahid Lixle Wuxuu go'aansadey in u socdaalo gobolada woqooyi oo iminka la yidhaa Somaliland. Socdaalkaasi wuxuu Xamar ilaa Hargeysa ay ku qaadatay 24 habeen iyo maalmood. Wuxuu doortay inuu gaadhi qaato siina maro dhamaan xerooyinka milatari inta uu ka gaadhi karo ee ku yaala goobahaasi aheydna socdaal salka ku hayey xog ururin iyo aqoon baadhis uu sameeyey korna u qaadey halgankii SNM.

Markii uu soo gaadhey magaalada Hargeysa waxaa u suurtogashey in uu qabanqaabiyo kulan balaadhan oo uu ku soo bandhigo xogtaa uu soo helay waxaana goobjoog ka ahaa Korneyl Mahdi Cali (IHUN), korneyl Maxamed Cilmi Galaal, Korneyl Aadan Shiine (IHUN), Cabdiraxmaan Baqdaadi, Axmed Galaas Jaamac,iwm. Waxaanu ku soo bandhigay in boqolkiiba afartan (40%)in ku dhaw ay saraakiisha ciidamada xarumahaa uu soo maray ay yihiin reer woqooyi, halka ciidanka qoriga sida uu aad uga booday soona jeediyey in la helo ciidan taageera saraakiishaa.

Waxaana go'aan lagu gaadhey in la abaabulo siday suurtogal ku noqon laheyd helintaanka ciidan. Waxaana madaxdii maamulka iyo ciidamada ee gobolada woqooyi laga dhaadhiciyey in loo baahan yahay in la sameeyo raaf ciidameed (shicibka ciidan laga dhigo) si loo xoojiyo ciidamada xoogga dalka. Kulammo badan dabadeed, waxaa la ogolaaday hawlgalka arintaa lana fuliyey iyadoo raaf ciidameed la sameeyey xiligaa hase yeeshee waxaa dibudhac ku keenay tirada ciidamadaa la helay waalidiintii oon fahmin ujeedada lacagna la hoos rooray maamulkii xiligaa jiray oo u soo daayey caruurtoodii la raafay inta badan. Inkastoo horumar wanaagsan lagu talaabsadey ooy sidii hore dhaanto heleena saraakiishaasi ciidan kaalmeeya tayo ahaan iyo tiro ahaanba.

Markay hawshaasi hirgashay ayaa Mujaahid Lixle wuxuu isagoo la kaashanaya hormoodkii kale oo si fiican ay u kaalmaysay in Generaal Salxaan oo markii labaad ee la soo badalay loo ogolaaday inuu soo xusho saraakiisha la hawlgalaysa. Waxaanu Generaal Salxaan soo badalay saraakiisha ciidamada ee ka soo jeeda gobolada woqooyi (iminka ah Somailand) oo u badnaa gobolada koonfureed. Hawlaha uu u banbaxey Mujaahid Lixle waxaa aad u fudueeyey saraakiishii ka hawlgalaysay aaga oo kula jirtay arinka ayna isku talo ahaayeen .

Qaabka maamul ee ciidankuna barigaa wuxuu tusaale ahaan ahaa sidan :
-Guudleh (hawiye) --- Abaanduulaha Ciidamada
-Axmed Dhagax -- Dagaal gelinta
-Maxamed Kaahin --- Sahanka
-Maxamed Cilmi Galaal -- Cirka
-Mahdi Cali -- Xerada Toon
-Aadan Shiine -- Xerada Cadaadley
-Cabdilaahi Xaaji Siciid – Xerada Buuhoodle

Dhinaca dhaqaalaha waxaa heegan u ahaa oo xidhiidh toos ah la lahaa saraakiishaa ganacsadayaasha ay ka mid yihiin Cabdilaahi Cabdi Good (Ihun), Ismaaciil Sh.Ibraahim (Ihun), Axmed Aw Cali Saleebaan , halka dhinaca Jabuutina ay jireen koox ganacsadaay oo taageero dhaqaale wadey uuna dhinaca xidhiihdka uga wakiil ahaa Maxamed Axmed Xirsi oo u shaqeyn jiray FAO ahna taasoo u suurtogalisay iskaga gooshi karo labada dhinac.Waxaa xusid mudan dhaqaalihii ugu horeeyey ee hirgaliyey inuu Mujaahid Lixle iskaga goosho gobolada dhexdooda iyo abaabulinta ciidamada in uu ka yimid kooxda Jabuuti .

Xiligan wuxuu go'aansadey in hawlihii u wadey ee in halgan ummadeed la galo uu si fiican ugu madaxbanaanaado. Si taasi ugu sii hirgasho qarsoodina u noqoto wuxuu iibsadey beerta ku taala Dhubato, agagaarka geedka Dheenta.

Beerta Dhubato (Haragwaafi waa halkii uun Ilaahay ha u naxariistee uu ku dhintay isagoo hawlgal ka fulinaya bilowgii 1988kii) waxay qayb weyn ka qaadatey hawlgalo badan ayna ugu hormood ahaayeen dagaaladii furashadii Madheera iyo Gacan Libaax. Iyadoo aheyd goob lagu qariyo hubka iyo rasaasta dhaqdhaqaaqa guduhu u baahan yahay.

Waqtiyadan waxaa la soo bedelay Gaani oo loo soo magacaabay taliyaha qaybta 26^{aad}, sidoo kalena ahaa madaweynihii goboladaa waqooyiga ee Soomaliya. Kaas oo awood balaadhan uu u siiyeey Afweyne Barre inuu Gaani ka sameeyo waqooyiga Somaliya wuxuu doono.

Sidoo kale waxaa xilligan ka samaysmay Jiddah gudidii ugu horaysay oo leh qaab dhismeed urur oo ka koobnaa Maxamed Xaashi Cilmi,C/salaan Yaasiin, Ismaaciil Buubaa,Maxamed Cali Faarax, Xasan Aaden Wadaadiid ,Cismaan Axmed (indhoole), Aadan Muxumed Hoori (Mataan), Cumar Maygaag Samatar, C/raxmaan Xasan Cali, Abashir, Casayr C/qaadir,Daa'uud Khayre, Axmed Saki, Qaalib Muuse oo ahaa maamulihii dugsigii sare ee Sheekh iyo Ina Jirde Aw-Cali. Waxaana gudoomiye u noqday Xasan Aaden Wadaadiid (Ihun), halka uu gudoomiye ku xigeena ka noqday Maxamed Cali Faarax.

Horaantii bishii April 6^{dii} 1981 ayaana si rasmi ah loogu dhawaaqay dhaqdhaqaaqii wadaniga Soomaaliyeed ee SNM.Waxaana gudoomihiyihii ugu horeeyey noqday mujaahid Axmed Jimcaale ,halka uu magaca la qaatey ahaa kii uu keenay mujaahid Aadan Maxamed Hoori (Mataan).Waxaana ciidan kobcin weyn u noqotay xadhigii aqoonyahanadii UFO ee dabayaaqadii isla gu'gaa oo markii maxkamada la soo saarayeyna ay gadoodeen ardeydii xilli ku beegnayd bishii Febraayo 20^{dii},1982 ^{kii} sameeyeena dhagaxtuurkii .

Waxaa nasiib daro weyn ah oo aan la filayn ahaa in dhacdadani Somaliland oo xor ah oo iskeed isku maamusha ay mar labaad soo noqotay bishii September 12 dii, 2009 kii oo labadii ku dhintay dhacdada hore labadoodii ay ku qudh baxeen tan danbena .Waa ayaandaro inteeda leh iyo taariikh aan la jaleecayn .

Maxamuud Maxamed Liibaan oo xilligaa maamule ka ahaa dugsigii sare ee Faarax Oomaar ayaa isagoo ka hadlaya isbadalkaa markaa dhacay iyo baraaruga dadweynaha waxa keenay yidhi: "waxaa jiray dhibaatooyin soo jiitamayey (remote causes) iyo dhib dhawaa (Immediate causes). Xukunkii milatariga ahaana wuu fashilmay lana soo baxay qalafsanaan,dhaqan xumo, diin la'aan, iyadoo dagaalkii 77kii ee lagu jabayna si fiican u mijo fayday ooy ku dhacday ciidan jabaa wuu wayracaa ayaa keentay inay aqoonyahanadii u dhashay goboladu arkaan dantii guud oo burburtay, mushaharka la siiyo macalinku hal baakidh oo sigaar muu goynayn .Xiisada jalas la garaacaba shan ardey baa maqnaa.Xukuumadii jirtayna cadaadiska kordhi mooyee talo kale way wayday .Tani waxay sababtay inay dadku baraarugaan kol haddii dhibtii saamaysay guri kasta si toos ah ama si dadban ".

Waxaa hogaanka qabtay sannadkii 1983kii madaxdii ciidamada iyadoo ururka guddoomiye looga dhigay mujaahid Cabdulqaadir Koosaar(Ihun).Halka uu ku xigeen ka noqday Aaden Shiine(Ihun),waxaana xoghaye ka noqday Mohamed Kaahin oo iminkana ah afhayeenka xisbiga Kulmiye.Waxaana loo magacaabey xoghayaha garabka hubaysan ee SNM inuu noqdo Mujaahid Maxamed Xaashi Diiriye"Lixle".

Runtiina intii ciidamadu maamulka hayeen waxaa ay soo hooyeen guulo badan.Waxaana taariikhda u gashay inay madaxdaasi ahaayeen kuwii ugu horeeyey ee caawimo ka keena dal aan ahayn Itoobiya. Iyadoo dawladdii hore ee Hantiwadaagga ahayd ee dalka Yementa Waqooyina(Cadan) ay ku caawisay qorigii la odhan jiray Nuur Madoobe, sidoo kale xiligan waxaa suurtogashay in la helay deeq waxbarasho ciidan ah.

Guulihii Mujaahid Lixle:

Wuxuu yidhi Rasuulku (SCW):
"If any of you have a date sapling on the doomsday he should plant it -if possible."
(Bukhari)

"What we do for we die with us, but what *we do for others remains and is immortal*".

gacma wada jirkeene waxaan gaar isaga yeelay
oday geeri ba'ay baa rasaas loola soo galaye
golihii Madheera iyo halkii gaadhka laga toogtay

gobanimadu sow maalintii Gacan-libaax maaha
goolbaa xasuus lehe midkaan galinay maaha
halka guurtidii lagala baxay taan ka gu'in maaha
waxa loo galaaftaa shacbiga sow kas gudhay maaha
Mujaahid Cali Banfas

-Aasaaskii SNM 1974-1981:

Abaabulkii iyo isku dubaridkii gundhigistii SNM ayuu mujaahid Lixle ahaa hormoodka loo tiriyo, wuxuu ahaa nin aad loogu hanweynaa u heelanaanta wuxuu aaminsanaa aadna loogu ixtiraami jiray.Wuxuu hadh iyo habeen u gaalabixi jiray xeryaha ciidamada si uu saraakiishii ka soo jeeday dhinaca woqooyi uga dhigo xog ogaal joogto ah uguna kala gudbiyo warka .Isagoo sarkaal sare ka ahaa dawladii habaarqabto ayuu u badheedhay gudogalka hawlahan sida qarsoodiga ah loo waday .Waa geesnimo mudan ku dayasho intaad habac noqon laheyd eed odhan laheyd beri baan hormoodka dawladaa ku jiray waxaa ku hortaala maxaad dalka iyo dadka u qabatey magacu ha ii danbeeyee.

-Kobocii askarta SNM iyo isbaridii saraakiisha :

Waxaa guulaha laxaadka leh ee si toos ah iyo si dadbanba loo siiyo mujaahid Lixle ka mid ahaa isku xidhkii hagar la'aaned ee askartii iyo saraakiishii , sidoo kalena ahaa dunta isku xidha saraakiisha. Mujaahid Cadisalaan ayaa tilmaamay in markii uu mujaahid Lixle la socodsiiyey halwihii socday uu u sheegay inuu la xidhiidho sarkaal sare Ismaaciil Cali Shaxaari .Waxay tani ka afcelinaysaa siduu xillalka iyo hawsha iskudubaridkeeda ugu feejignaa ,iyadoo waliba taxadir badani jiray.

Xidhiidhka shaqo saraakiishii dawlada u daacada ahaa ee uu la lahaa aad buu u dhawri jiray, taasaana hawlo badan ka kaalmaysay.Tusaale ahaan mujaahid Lixle markii la soo badalay Ina Xaashi "Gaani" wuu la fadhiistay, iyagoo aqoon fiican isku lahaa ka hor. Kulankaasi wuxuu Gaani oo aad u yaqaanay Mujaahid Lixle iyo kartidiisa ku dhamaadey jawi fiican ayna ku heshiiyeen in saaxiibtimadu ahaato halkeedii.

Sidoo kale Mujaahid Ibraahin Koodbuur (Ihun) oo waqtigaa ka mid ahaa saraakiishii ay aadka isugu dhawaayeen Gaani, waxa uu Mujaahid Lixle kula taliyey Ibraahin Koodbuur in uu ku dedaalo sidii uu ugu dhawaan lahaa Gaani, isla markaana uu uga mid noqon lahaa saaxiibadiisa gaarka ah, si ay ugu suurto-gasho in ay helaan xogihiisa gaarka ah.

-Jeelka Mandheera

> "*Marka laga hadlayo Mandheera inta muhiimka ahi waxa weeye dabcigii uu lahaa halgankii SNM ay soo gashay, oo aad arkayso in labada arrimood ee ugu muhiimsan hawlgaladii ay fuliyeen xoogagii SNM inay ahaayeen hawlgalkii jebinta jeelka Mandheera oo SNM ugu suntanaa (Hawlgalkii Badbaado) iyo hawlgalkii laglau baxay Muj: C/laahi Askar oo isna loo yaqaanay hawlgalkii (Bad-Jeex). Labadaa hawlgal waxay tilmaamayaan awoodii ay SNM lahayd oo ku dhisnayd laba tiir oo kala ah taageeradii ay dadku siinayeen halgankii SNM iyo Ilaahay oo u hiilinayay maadaama ay xaq ku socdeen*" , ayuu yidhi Mujaahid Boobe

Waxaa baryahan aad u socday xadhigii waayeelka iyo waxgaradka gobolada woqooyi xiligaa (Somaliland iminka), waxaa kaloo intaa hareero socday dilka, dhaca, hagardaamada, iwm ee bulshada lagu hayey.

Waxaa la ururiyey boqolaal qof laguna guray xabsiga weyn ee Madheera. Mujaahid Lixle wuxuu ka dalbadey ciidan tababaran Mujaahid Maxamed Kaahinoo ku sugnaa Gaashaamo.Waxaa loo soo diray ciidan uu hogaaminayey Cabdikariin Aadan Maxamed – Sumuni-(Ihun).Ciidankaasoo isla markiiba si fudud ku jabsaday Jeelkii Madheera ,isla markaana badbaadiyey dhamaan dadkii ku xidhnaa.Waxaa u suurtogashayna inay si nabadgalyo ah xadka uga talaabaan.Markaa ayuu mujaahid ku leexday Burco si uu hawlihii u sii wado.Tani waxay muujisay awooda SNM, dadweynaha ooy baraarujisay una bislaadey taageerida SNM, tamartii ciidanka xukuumadii habaarqabto oo fashilantay, iwm.

Mujaahid Jaamac Maxamud Aden Doolaal oo ka mid ahaa mujaahidiintii ka qaybgalay weerarkii lagu jabsadey jeelkii weynaa ee Mandheera ayaa lahaa:
"Weerarkaas oo uu khidadiisa lahaa Mujaahid Marxuum Lixle Ilaahay Janadii Fardowsa ha ka waraabiyee waxay maalintaas SNM ku guulaysatey in ay xoriyadoodii u soo celiso muwaadiniin badan oo lagu haystay Xaqdaro".

Waxaa ka mid ahaa dadkii maalintaa Ilaahay ku kaalmeeyey hogaaminta mujaahid Lixle inuu ka furto godka lagu waabay waayeelkan:
-Xaaji Yaaxeen
- Cawl Cilmi Cabdala oo ahaa Maayarkii hore ee Hargeysa.
-Adan Maxamed Diiriye (Aadan Ruush)
-Cumar Hadraawi
-Ina Maxamed Siraad

Taariikhdu markay ahayd badhtamihii sannadkii 1983kii ka dib, jabintii jeelka madheera waxaa ururka SNM noqday mid xoogan oo ka dhisan dhinaca ciidamada. Qalabka ciidamada iyo hubka Tiknikada ahba waxay ka furteen ciidamadii Afweyne.Waxaana ururku sameeyey inuu weeraro badheedh ah ku sameeyo ciidamadii taliska Barre.
Sidoo kale wuxuu ururku taageero hagar la'aaneed ka helay dadka shacabka ah ee degan dalka gudihiisa iyo dibadiisaba.

-Himilo dheer:

Wuxuu Mujaahid Maxamed Xaashi ahaa geesi aad u fiiro dheer, oo ka shidaal qaata himilada dheer iyo ta gaaban ee halganku ku sugnaa .Wuxuu had iyo jeer doorbidi jiray kuna dhiirigalin jiray dadweynaha inay hawl qabtaan ,hadalkuna yaraado .

-Qabashadii Cabdilaahi Askar:

Waxaa Mujaahid Lixle la joogay magaalada Burco Mujaahid Cabdilaahi Askar, Mujaahid Xayd, Mujaahid Cabdisalaan Turki , iyo kuwo kale. Waxaa go'aan lagu gaadhay in dalka gudihiisa laga hawlgalo lana fuliyo dilal qoorto loogu dheereeyo hogaanka gobolada woqooyi dhinac kasta , inkastoo ay aheyd arin adag layslana meel dhigay in aanay dadku wali bislayn eey heesaha kacaanka u yara nugul yihiin .Haddana waa lagu dhaqaaqay oo Mujaahid Cabdilaahi Askar, iyo Mujaahid Cabdisalaan Turki ayaa loo diray inay Hargeysa tagaan ooy halkaa hawlaha hormood ka noqdaan si ay hawlo hagardaamo ku rida xukunkii dalka haystay uga fuliyaan magaaladaa . Nasiib daro waxaa gacanta dhiigyocabkii galay mujaahid Cabdilaahi Askar.

Mujaahid Faarax Yuusuf Nuur, (Farax Xadhige) oo laga ka waramayey mujaahid Lixle ayaa sheegay in uu mujaahidku(Lixle) ugu tagey Burco.Wuxuuna Lixle halkaa joogay muddo ku dhaw 4 bilood ah,kana waday arimmo halganeed.Hase yeeshee saddexdii cishaba waxaa la geyn jiray meel gaar ah oon cidi ogeyn. Mudadaas uu Burco joogay ayuu mujahid Lixle qabtay shir uu ugu yeedhay saraakiishii SNM ee joogay dalka gudihiisa iyo dibadiisaba.Waxaana ka soo qayb galay qaar ka mid ah oo umay suuro galin dhamaantood. Waxaa ka mid ahaa mujaahidiinti ka soo qayb gashey Cabdilaahi Askar, Xayd oo ahaa bayloodkii Gaani ,Cabdisalaan Turki iyo mujaahidiintii arrinta gudaha ka wadey.Waxaa arrinta la rog rogoba wuxuu soo jeediyey mujaahid Lixle in Hargeysa inqilaab lagu qabto. Waxaanu mujaahid Lixle u diray sahan Cabdilaahi Askar, waana laysku raacay arintaas. Mujaahid Abdilaahi Askar markii uu tagey magaaladii Hargeysa, lana kulmay madaxdii u joogtay SNM Hargeysa, ayaa maalmo ka dib nasiib daro la qabtay ,xabsigana loo taxaabay.

Waxaa kaloo arintaa ka hadlay Cabdisalaan Turki oo lahaa :“ Horta wixii ka horeeyey hawlgaladii gudaha waxaan aad noo kaalmaynayn dadweynaha oon u bislayn waayaha jiray markaa, hase yeeshee way jireen in talada lagu hayey hormoodkii xukuumada u joogay goboladaa qoorta loo dheereeyo.Qabashadii Cabdilaahi Askarna qayb weyn bay ka qaadatey yoolka noocaasi inuu isbadalo ”..

Iyadoo isbadal ku yimid qorshihii lagu balansanaa ayaa waxaa la gudogalay sidii Cabdilaahi Askar loo samatobixin lahaa, laguna guulaystay iyadoo uu hogaaminayey hawlgalkaa Mujaahid Ibrahim Koodbuur oo Ilaahay ha naxariiste u dhintay xanuun gu’gii 1987ka dhamaadkiisi.

-*Dagaalkii Burco Duuray:*

Wuxuu mujaahid Lixle aaminsanaa in hawlgalada Madheera oo kale ah la fuliyo si loo wiiqo awooda xukuumada ,niyad jab weyna loogu rido .Waxa ka waramaya Mujaahid Ibraahim C/laahi Xuseen (dhaga wayne) oo ka mid ahaa saraakiishii SNM yidhina sidan: “16-kii October waxa aan joogay meesha la yidhaahdo Sheed Dheer oo uu deganaa ciidan, Dabadeeto waxa ila soo hadlay Alle ha u naxariistee Aadan Shiine, oo ahaa Wasiirka Gaashaan dhiga ee SNM, waxaanu ii sheegay in la iga bedelay halkaa oo aan u wareegayo dhinaca barriga gaar ahaan aagga uu joogay Lixle ee Burco Duuray.Xilligaana fadhiyada ciidamada SNM waxay u qorshaysnaayeen qaab deegaamaysan, isla markaana waxa socday oo uu Alle ha u naxariistee Lixle gacanta ku hayay qorshe ballaadhan oo loogu diyaar garoobayay guddagalka SNM.Waxaana laysku qanciyey in aanay jirin sabab aanu Qaaxo u sii fadhinaa.Dabadeetana aanu ku go'aansanay in gudaha la isku shubo shir aanu ku yeelanay Laanqayrta markaa ka horna sidaa waxa soo codsaday alle ha u narariistee Lixle oo yidhi waxa aan u baahanahay in la igu soo xoojiyo waayo aniga iyo Xasan Yoonis waxa aanu xilliga ku qornayn Sheed Dheer”.

Tirada ururka SNM xilligaas aad buu uga yaraa ilaa 500 oo qof ,waliba u badnaa saraakiil qabanayey dhamaan hawlaha ciidan oo dhan dirawalnimo,tababarid,sahan,hogaamin iwm. Mujaahid Cabdikariim Xaashi Cilmi ayaa isagoo ka waramay arinta dhabta aheyd ee ka jirta gudaha ciidanka SNM ayaa lahaa :“Xaaladda ururka SNM waxay xilligaa ahayd mid iska liidatay xagga ciidammada iyo xagga saadkaba. Maalintaas waxaannu ku jirnay toddobaad socod ah, dagaalkaasina waxa uu ahaa mid laysla hiir-beelay, waxana ku dhintay mujaahidiintii ugu qiimaha weynaa ee SNM, kuwaas oo mudan in la xusuusto oo la ururiyo taariikhdooda”.

Xuskii maalinta shuhadada ee 17-10-2007 ayaa Aadan Maxamed Diiriye (Aadan Ruush), uu si qoto dheer uga xog warramay taariikhda 17 October iyo ujeeddooyinkii hawlgaladaas. Waxaanu sheegay in qorshaha maaintaas lagu socday uu ahaa in ciidammadii SNM ay dalka gudihiisa saldhigyo ka samaystaan.Waxaa kaloo uu shgeeay in ujeeddada hawlgalkaasi ahaa in Buuralayda iyo dalka gudihiisa saldhigyo laga sameeyo oo halkaa ciidamo SNM ahi ku sugnaadaan.Tani oo suurtogalinaysay in halkaa laga jabhadeeyo anigu .Aadan Ruush maalintaas wuxuu ku sugnaa magaalada Jigjiga oo uu ururka Jigjiga uga wakiil ahaa.Jigjiga xilligaa waxay aheyd halka dagaallada iyo maamulkaba laga taakulaynayey oo raasaasta iyo adeegyada kaleba ciidammada looga keenayey.

Aadan Ruush ayaa isagoo ka waramaya dhimashada maalintaa si gaar ah u tilmaanayd lahaa :"Dagaalka SNM had iyo jeer wuu iska barakaysnaa dhimashadiisu may badnayn, dagaalkani [Buro-duuray] wuxuu ahaa dagaalkii noogu dhimashada badnaa oo labataneeyo ku dhawaad ay ku dhimatay, meel boqolaal Faqashta kaga dhinteen bay afar qof SNM-ta kaga dhiman jirtay, maalintaasaa noogu dhimasha badnayd, dagaalkiina ujeeddadii laga lahaa hadday fushay guul buu ku dhamaaday."

Mujaahid Lixle ayaa hogaaminayey maalintan mudan maamuuskeega , kuna suntan bogaga taariikhda ee Somaliland.

-**Nalka wadooyinka ee magaalada Hargeysa (Traffic Lights**):

Inkastoo nalkaa kala haga wadooyinka magaalada Hargeysa la hirgaliyey geeridii Mujaahid Lixle ka dib, waxaa mudan in la sheego inuu Lixle qayb weyn ku lahaa arintaa gashina galiyey.Odayaashii, aqoonyahankii iyo waxgaratadii ummada ayaa jeelka Madheera lagu guray xilli ku beegnayd 1983. Mujaahid Lixle wuxuu dareemay inay arintani dabar go' weyn ku tahay ummada dhulka haatan ah Somaliland,sidaa darteed ayuu hawlgalkiisii ugu horeeyey ee ciidan weerareed ku bilaabay dib ugu soo celinta xoriyada laga qaaday dadweynahaa, tusayna dawladii habaarqato inay jiraan dad dhiiran oo hiil iyo hooba la garab taagan dadka cagojuglaynta lagu hayo.Waxaa maxaabiistaa ku jiray Cawil oo loo tiriyo maamul degmeedka(mayor) kaliya ee soo maray Hargeysa , wax muuqdana qabtay oo ah nalkaa wadooyinka kala haga .Ilaahay doonistii ka sakow, Dareenka Lixle la'aantii nalkaasi muu daarnaadeen.

Dhacdooyinka Tilmaaman :

- Horaantii 1977 kii waxaa degaanka Gabiley aad looga dareemay roob la'aan xad dhaaf ah keentayna biyo la'aan guri walba saameyn ku yeelatay .Waxaa qaybta 26aad haystay Salxaan. Mujaahid Lixle oo hawshiisa ugu weyni aheyd u hawlgalida hawlaha lagu taakulaynayo dagaalkii 1977 kii, hase yeeshee waxaa dareenkiisa ka tagi wayday biyo la'aanta ka jirta aaga uu joogay markaa oo uu go'aansadey inuu wax ka qabto in badana ay is hor fadhiistaan hormoodkii ciidamada xiligaa oo uu ugu horeeyey Salxaan. Waxaanu mujaahid Lixle ku doodayey siday suurtogal u tahay in dadkeenu haraad aan wax ka qaban karno u dareemaan suurtogalna ku tahay in booyado biyo ah ay dhinac maraan dad u baahan.

Dadaal badan ka dib , wuxuu u hawlgalay dayactirkan si fiicana wax uga qabtay .Hormoodka degaanka Gabiley oo ay hogaaminayeen labada waayeel ee Sh.Muxumed Raage(IHUN) iyo Sh.Muxumed Warsame (IHUN) abaabuleen qorshe ahaa in la hor fadhiisto wiilkan dhalinyarada ah ee waxtarka intan leeg gaystay loona mahadnaqo si fool ka fool ah.Kulan la cayimay dhawr jeer muu suurtogalin iyadoo uu marna Korneyl Cabdiqaadir Xaaji Cumar Askar dartii oo marti u noqdey Mujaahid Lixle suurtogalin la'aanta kulamadaa ka qayb qaatey. Hase yeeshee ugu danbeyntii kulankii wuu hirgalay waana lays fahmay. Kulankaasi si fiican buu u dhacey markii danbe oo mujaahid Lixle ka helay duco, waano iyo salaad joogtayn.

Culimadaasi oo matalyey dadweynaha degaanka uu kaalmeeyey way u mahadnaqayeen ,Mujaahid Lixlena wuu ka faa'iiday kulankaa.Waxaana si fiican u dareemay dadkii halganka kula jiray Mujaahidkaa Lixle sida mujaahid Rashiid Sh.Cabdilaahi oo ka waramayey halgankii ayaa yidhi:" Waxyaalaha laysku hayey waxaa ka mid ahaa in laba dhinac loo kala jabsanaa dhinaca diinta oo Mujaahid Lixle koox ku jiray hormoodkooga…". Halka laga hayo inay halhays u noqotay mar kastoo dagaal la galayey inuu askarta waydiiyo "qof aan salad tukanin ma idinku jiraa ". Mujaahid Cabdixakiin Maxamed Aadan (Ihun)oo ka waramyey hawlgalkii Badbaado ayaa yidhi: "……. *Alaabadayadii tuurtaanu ku qaadanay, 45 nin baanu ahayn Maxamed Xaashi Lixle falaytkii ugu horeeyey ee aanu samayno waxa uu nagu yidhi qof aan tukanini ma idinku jiraa, waana ereyga aanan weligey ilaawayn, dhawr mujaahid baa yidhi haa, wuxuuna yidhi imika maryihiina ku maydha durdurkan waynaynu wada tukanaynaa nin aan tukanayn dagaal wada geli mayno"***.

-Mujaahid Maxamed Kaahin oo ka hadlaya furashadii Mandheera ayaa yihi: "Dhacdadani waxay ku soo beegantay xili uu taliskii Siyaad Barre cadaadis ku hayay dadkii Soomaaliyeed ee uu xukumayay iyadoo markaa jeelka Mandheera lagu xidh-xidhay rag badan oo waayeel ahaa oo intooda badan laga ururiyay magaalada Hargeysa. Waxaana lagu xidhxidhay Mandheera.Taana ujeedada uu taliskii Siyaad ka lahaa waxay ahayd inuu cabsi iyo argagax ku abuuro dadka shacabka ah si aanay wax dhaqdhaqaaq ah u samaynin. Waxaa markaa gudaha ku sugnaa oo xidhiidhinta hawlgalka ka waday geesigii caanka ahaa, mujaahidkii Qaaliga ahaa. Muj: Maxamed Xaashi Diiriye (Lixle) isagoo bil ka hor noogu yimid Gaashaamo. Waxaana soo qaaday Muj: Aaden Dayuur, isagoo Lixle intuu caadi uga qaaday Hargeysa caadina ugu soo noqday.

Markaa Muj: Lixle wuxuu la yimid fikrad ah maadaama uu cadaadis badani dadkii gudaha ka haysto maadaama lala dagaalamayo dadka qiyamkoodii waxaa loo baahanyahay in hawlgalkii Mandheera oo kale la fuliyo si dadka Mooralkooda sare loogu qaado taliska Siyaad Barre-na loo tuso in dadka uu boholaha ku guray ay jiraan qaar kale oo halgamayaa oo u hiilinaya, taasoo fajiciso ku ridaysa. Run ahaantii fikradaasaa sal u ahayd hawlgalka".

Falcelinta Saaxiibadii :

-Cabdiraxmaan Cawl "Baqdaadi" oo ka waramaya hab dhaqanka Mujaahid Lixle ayaa yidhi: "Wuxuu ahaa nin aad u dhiiran, had iyo jeerna ugu hormara hawsha uu rabo in la qabto.Wuxuu ahaa nin aad u afgaaban waxqabadkiisuse badan yahay,waxaa faro ku tiris ah inta shir ee uu ka qayb galay intii lagu jiray halgankii SNM,inkastoo hawl uu ka madhnaa aanay jirin,waxaase tiro batey inta hawl halgameed ee uu ka qayb galay".

Waxay tani ka afcelinaysaa inuu ka anboqaadayey eray hawleedkii ahaa hadal yar hawl badan baa ummadaydaay horumar lagu gaadhaa .Waxay tani si qurux badan inoo xasuusinaysaa oo kale habdhaqankii toosnaa Nabigeena (SCW) oo hawl kasta la qabanayo ugu horayn jiray lana qaban jiray asxaabta(RC), sida godkii dagaalkii "Khandaq", timo xiiristii heshiiskii Xudaybiya , iwm. Hawl yar , hadal badan baa ummadaydaay horumar lagu gaadhaa ayaa hogaan u aheyd mujaahid Lixle.

-Rashiid Sh.Cabdilaahi "Rashiid gadhweyne" oo ka waramaya Lixle wuxuu yidhi "Wuxuu ahaa nin aad u daacad ah wuxuu aaminsan yahay, aad u hadal gaaban, hawl qabashada hayin u ah, inta badan noloshiisa ku jiray meel halis ah si uu uga midho dhaliyo halgankiisa, una rumeeyo hamigiisa .

-Mujaahid Turki oo ka waramaya maalmahey ugu darneyd wuxuu ku darey in maalintii furashada jeelka Madheera uu ka horeeyey Mujaahid Lixle ,ayna arkeen askariga dusha sare jooga oo dhinacooga soo eegaya iyagoo ku gabanaya gidaar uuna mujaahid Lixle ka codsadey inuu hore u dhaqaaqo isagoo ku yidhi "hore u soco markuu askarigaa dusha joogaa ku toogto (dilo) ayaan dilayaa ".Markaasuu Mujaahid Turki wuxuu ku hadlo garan waayey horena u dhaqaaqey mise waa askarigii oo qorigii uu kor u qaadeyba dhulka yaala ayna qabsatey xabadii uu ku riday mujaahid "Lixle ".

- Axmed Maxamed Siilaanyo oo ka hadlayey Xafladda(19 Oct, 2007) shabakadda Halganews ku soo bandhigtay qayb ka mid ah sawirrada iyo qoraallada halgankii SNM oo lagu qabtay hoteelka Imperial ee magaalada Hargeysa wuxuu yidhi :"17 October waxaa loo asteeyey inay noqoto maalinta shuhadada ururkii SNM oo ku beegan sannad-guuradii 23aad ee ka soo wareegtay waqtigii uu dhacay dagaalkii u horreeyey ee ay si fool-ka-fool ah iskaga horyimaaddaan mujaahidiintii SNM iyo ciidammadii taliskii Siyaad Barre,kadib markii ay weerar aan gabbasho lahayn ku qaadeen saldhiggii ciidammada Faqashta ee Burco-duuray 17 October 1984-kii, dagaalkaas oo ay ku shahiideen dhawr iyo labaatan mujaahid oo uu ku jiray Mujaahid Maxamed Xaashi Diiriye (Lixle) oo hoggaaminayey hawlgalkaas, kana mid ahaa shaqsiyaadkii **bud-dhigga** u ahaa **hanaqaadka** geeddi-socodka halgankii hubaysnaa ee SNM".

- Guddoomiyaha Xisbiga Mucaaradka ah ee UCID Faysal Cali Waraabe oo ka hadlayey xaflad(Oct 19, 2008) xuska mujaahidiinta aya yidhi: "Maalintii Shuhadadan la laayay ee 17-kii October anigu waxaan joogay Xamar, qoladii Faqash ismay lahayn SNM dib bay u waari doontaa. Waxaanay u qaateen SNM in ay u dhammaatay maadaama ay raggii ugu sarreeyay ka dhinteeen. Mujaahid Lixle xitaa raggii cadowga ayaa u qiray inuu ahaa nin qiimo leh oo halyay ah, waxaanay ku sheekaysanayeen in ninkaasi uu ahaa nin Cilmi leh oo Injineer akhlaaq iyo edeb leh ahaa".

- Mujaahidada Yurub Abiib Cabdi oo ka mid ahayd haweenkii faro ku tiriska ahaa ee ka soo qayb-qaatay halgankii dib-u-xoreynta ee uu hormoodka ka ahaa ururkii SNM, haatana ka mid ah masuuliyiinta Jimciyadda Sooyaal,ayaa u ducaysay mujaahidiintii ku shahiiday halgankii dib-u-xoreynta ee SNM, gaar ahaan Mujaahid Maxamed Xaashi (Lixle), oo ay sheegtay inaanay iyadu arag balse ay taariikhdiisii iyo doorkiisii halyeynimo baratay xiligii ay iyadu ku biirtay halganka.

-Gudoomiyaha xisbiga KULMIYE ee gobolka Hargeysa, Axmed Cumar Cabdillaahi (Xamarji) ayaa lahaa : "Maanta munaasibaddan xuska 17 October,2007 waxay ku soo beegantay xilli diiwaangelinta codbixiyeyaashu dalka ka socoto, diiwaangelintu maaha wax uu Daahir Riyaale keenay, maaha wax gudoomiyaha Komishanku keenay, maaha wax ay Axmed Siillaanyo iyo Faysal Cali keeneen, balse waxaa keenay Lixle oo hadaanu Lixle u dhiman may timaadeen maanta diiwaangelintu."

- Mujaahid Cabdillaahi Askar oo ka hadlayey xaflad(18 Oktoober ,2007) lagu xusayey maalinta mujaahidiinta ayaa waxa uu yidhi; "Mujaahid Lixle madigii gudaha ee aannu haysanay ayuu ahaa, waxaannu ahaa halyey qiimo badan oo SNM ku goblantay".

Geeridii Lixle :

Bahda Mareegta Farshaxan
Oktoobar 17, 2009

Gadhqaadkeedu waa leexsanyahay, waana gudayaaye
Garar loo maleeguu ku ridey, guura socodkiiye
Guudkeedu waa wada finiyo, gaatir iyo booge
Hadday gooli-baadh tahay waxaa, gabay raggeediiye
Guyaal iyo guyaal bay rarteen , gocorro shaydaane
Iyadoon goblamin baa haddana , geelo loo hadhaye
Gol-dalooladeedaa ka badan, galalka ciideede
(Hadraawi)

Waxaa isa soo tarayey kalsoonida sii yaraanaysaa ee dawladii Itoobiya ay ku qabtay jabhadaha SNM iyo SSDF. Si ay SNM u muujiso inay u soo baxeen halgan ayaa saraakiishii ciidamadu ka fureen tababar magaalada Awaare .Waxaa kaloo jirtay inay ciidamada faqashtu socdaal joogto ah ka iman jirtay ilaa magaalada Labisagaale kuna imanayeen ilaa Qawlbuulale iyo Burco Duuray. Tababarkii markuu dhamaaday ayaa saraakiishii goosteen inay dhaqdhaqaaqan ciidamada faqash yareeyaan oo dagaalkii saddexlaha(Aaga bari , aaga dhexe ,iyo aaga galbeed) ahaana la galo.

Mujaahid Lixle ayaa diyaariyey markan qorshe balaadhan oo loogu diyaargaroobayey gudogalka dalka aadna loogu qancay inaanay jirin sabab kale oo loo sii joogo Qaaxo.

Ibraahin Dhagaweyne iyo Xasan Yoonis waxay joogeen Sheed Dheer, Axmed Mirena wuxuu joogay Daalaco, Baaldhayena waxaa ku sugnaa Maxamed Kaahin,Ismaaciil Ganacsato,Garandaash ,Abokor Yare iwm, halka Ibraahin Koodbuurna ahaa abaanduulaha ciidamada xoraynta ee SNM.Sidoo kale Lixle oo maalmo yar uun ka hor ka degay Xooghayaha gaashaandhiga isaguna soo degay Burco Duuray.Waxaana Xarshin ku sugnaa Aadan Shiine oo ahaa xoghayaha gaashaandhiga ayna weheliyeen taliska galbeedka ee Maxamed Cilmi Galaal , Mahdi Cali Faarax ,Aadan Saleebaan Cali iwm.

Kolay wartabiye lama waayee, ciidamadii faqashtu waxay ka war heleen qorshahan balaadhan sidaa darteed wuxuu Gaani soo xulay ciidan beeleed uu ka kala keenay Cadaadley uuna ka mid ahaa diinta lagu wada gabaye ka sheegta iminka sheekha ee Xasan C/llaahi Xersi (Xasan Turki) iyo Hargeysa , waxaana hogaan looga dhigay ciidan beeleedkaas nin mijir ahaa oo la odhan jiray Jihaad.

Mujaahid Lixle ayaa xiligan dhiniciisa ka diyaariyey qorshe ballaadhan oo loogu diyaargaroobayay guddagalka SNM ,waxananu ka codsadey fulinta hawlgalkaa saraakiishii oo iyagu laftigoodu taageeray qorshahaa ka dib shir ay ku yeesheen Laanqayrta .

Markaa ay soo baxayeen ciidamadu faqashtu ayaa waxaa uu Ibraahin Dhagaweyne warqabadkii isgaadhsiinta uu ka ogaaday inay faqash diyaarinayso weerar gaadmo ah oo ay ku qaadayso saldhigyadaa, dabadeeto wuxuu taar u diray Taliska Guud .Taarkaas wuxuu uga digayey tibaaxdaa uu helay laakiin nasiib darro Ibraahim Kood-buur oo ahaa

abaanduulaha SNM-ta oo uu xilligaa fadhigiisu u badnaa Celiyo oo cabaar u jirta Burco-Duuray wuu ka maqnaa saldhigiisa oo muu helin Taarkaas, hasa yeeshee waxa uu taarkii helay labadii duhurnimo maalintii danbe ee 17-kii October markii uu ku soo noqday Celiyo, dabadeedna inta uu ku naxay ayuu is rogay si uu uga gaadho Burco Duuray oo uu u wargeliyo.

Sida uu sheegay Mujaahid Yuusuf Maydal dagaalkaasi dhex maray faqashtii iyo ciidamadii ayaa Burco Duuray socday 2:00 Duhurnimo ilaa 6:00 maqribnimo ,waxaana guutadadii Sayid Cali la odhan jiray oo ka koobanayd dhamaan fadhiisimihii SNM uuna taliye u ahaa Mujaahid Lixle kagaga shihiiday ku dhawaad sodomeeyo Mujaahid, iyadoo dadkii degaankaana ay kaga dhinteen ilaa sodomeeyo kale , halka ay kagaga dhaawacmeen sodomeeyo mujaahid dhinaca faqashtana waxa kaga dhintay 150-Askari waxaana kaga dhaawacmay 32-Askari hub iyo gaadiid badana waa laga qabsaday. Ciidamada SNM ee halkaa ka dagaaldhigay ee u gaashaandhigay saanadii,awoodii,iyo xoogii ciidankii faqashta ee sida beelaysan loo soo hawlgaliyey sida la ogyahay tiradoodu may gaadhin 200 mujaahid.

Mujaahidiinta halkaa ku shahiiday waxaa ka mid ahaa Marxuum Mujaahid Maxamed Xaashi Diiriye oo noqotay hagardaamo weyn oo runtii soo gaadhay ururkii , hase yeeshee aan waxba ka badalin qorshihii dagaal ee dhidibada uu u taagay mujaahid Lixle lana galay dagaalkii buuraha sidii qorshaynayd.Kumay riyaaqin dagaalkaa faqashtu ee wuxuu dhaxalsiiyey hoog iyo halaag culus, halkaasaana loogu qoorgooyey ilaa hogaamiyihii ciidan beeleedkaa ee Jihaad la odhan jiray.Waxaa kaluu awoodooda wiiqay gaaskii labaad ee qaybtii 26 taasoo hawl yareysay gudagalka mujaahidiinta SNM oo xudduuda ku dherersanaa.

Mujaahid Lixle hooyadii Ardo oo ka waramaysa geeridaasina ayaa sheegtay in telefoon loo soo diray looguna sheegay geeridaa inankeedii Lixle .Maqalkaa ah in uu Lixle dhintay ayaa sababtay inay dhulka ku dhacdo,miyir doorsoontana. Hase yeeshee markay baraarugtay is aragtay iyadoo taala dhulka oo dhinacaa bidix oo dhami Baralaati (aanu dareen lahayn) yahay.Dhaawac maalintaa ka soo gaadhay feedhaha iyo dhabarka ayaa Hooyo Ardo ilaa hadda la jiiftaa oo dhulyaal ku tahay. Mujaahid Lixle ayaa aabihii naxdintii iyo xanuunkii uu geeridaa ka qaaday muddo yar ka dib uu u geeriyooday.

Halkaasuu mujaahid Lixle ku shahiiday bishii Oktoobar 17^{keedii},1984.Waana maalinta loogu magac daray maailnta mujaahidiinta oo aheyd maalintay ciidamada SNM ugu dhimasho badnay.

Xus iyo Maamuus :

Si loo sugo jiritaanka magaca halgamayaashii ayaa mid ka mid ah labada xaafadood ee ugu waaweyn Hargeysa loogu magacdaray Mujaahid Lixle. Waxaan marna maanku hilmaamayn siidayntii maxaabiistii Madheera oo guul weyn aheyd hagardaamana ku aheyd dawladii habaarqabto.

Sheekh Aadan Siiro oo ka hadlayey mujaahid Lixle ayaa lahaa : "Mujaahid Lixle wuxuu ka mid yahay dadka tirada yar ee dhifta ah ee ummada reer Somaliland ku dhaadato". Waxaanu xusay Sheekh Aadan Siiro in ay ayaan daro tahay in dadkii noocaas ahaa ee udub dhexaadka u ahaa taariikhda dalka la iloobay**.**

Maalintaa ku beegnayd dhimashadii Mujaahid Lixle (IHUN) iyo Mujaahidiintii la geeriyoodayba waxaa loo qoondeeyey in laga dhigo maalinta Mujaahidiinta, waana maalin qiimo weyn ku leh ummada Somaliland oo aan la ilaawi karin,halka ay mujaahidiinta qaarkood ku tilmaameen inay ahayd maalintii ay isbarteen Faqash iyo SNM.

Geesiga mujaahid Lixle ayaa tix iyo tiraaba lagaga hadlay, waxaana ka mid ahaa maansoyahanka magacaabay Aadan Tarabi Oogle, Maxamed Ibraahim Warsame Hadraawi, Ibraahim Aw Saleebaan Cilmi Gadhle, Maxamed Axmed Xirsi, Cali Banfas iyo rag kale oo badan.

Birjeex deedankeedii
Laga diday kulkeediyo
Degsan baan ku dhaartay

Lixle damacyadiisii
Diric Ina Saleebaan
Duxan baan ku dhaartay
Hadraawi

Hadaanan hadaanan
Hadaanan gadoodka
Lixloow guga maanta
La soo hadhin guusaha
Waxaan gabaygayga

guubaabada ciilka
Gammaanka cadhaysan
Gargooska ku naaxsho
Haddaan gulufkooda
ku soo gambiyaaye
Cali Banfas

Shilke-liqe, Shaf-buur iyo Maloosh, Shakaytiyo Waafi
Shakiib Burur, Shiri iyo Nagiib, Shaarub iyo Xaamud
Shir-bilihii Koosaar iyo Tusbax, Shiishaayiyo Aaden
Shayib Gurey, Shabcaaniyo Bidhiidh, Sheekeeyiyo Raage
Shulaac iyo Malgaash iyo **Lixle**, Shoodhe Gacma-dheere
Yuusuf Dhamac Xasan

Hindisihii **ina Xaashi** waa, Lama Hilmaamaane
Duqsi waa Halkuu Galay Raggii, Huriyay Duullaane
Waa Halkuu Wadaad-Diid Go`aan, Qaatahy aan Hadhine
Waa Horseedkii Koosaar Wadiyo, Haybsigii Madare
Waa Horkicii Jimcaaliyo Ragguu, Soo Hannaan baraye
Maxamed Cali Cartan (Haldeeq).

Dhacdooyinkii gu'gii 1984kii:

-Bishii March 1984 waxa xabsiga loo taxaabay sideed iyo toban arday (18) oo da'doodu ka hoosaysay 17 jir iyo macalin la odhanjiray Cali Xasan Adan (Ali-Banfas)

-Maxamad Mooge Libaan Ilaahay naxariistii janno haka waraabiyee wuxu shahiidey 5/6/1984 kii isago hawlihii xoraynta ku fogaan.

-24 Nov 1984 Waxaa la afduubay diyaaradii 707 lagana afduubay magaalada Muqdishu lana dajiyey madaarka caasimadda Itoobiya ee Adis-ababa .Waxaa fuliyey falkaa geesimada lahaa Cawil Cadami Bur-haan oo ahaa Kabtan ka tirsanaan jiray ciidankii Asluubta Soomaaliyeed, Baashe Muuse (Baashe-diig) oo isna ahaa macalin wax ka dhiga.Waxaana madaarka Adis-ababa kaga biiray afduubka diyaaradda C/wahaab Cabdi Jaamac (Nakruuma) iyo Siciid Yuusuf Cabdi (Xabashi), waxayna ka mid ahaayeen dagaalyahankii ururka SNM ee xiligaa fadhiisimada ku lahaa dalka Itoobiya.dugsiyadii Soomaaliya iyo Axmed X. Maxamed (Axmed-waraabe) oo isna ahaa macalin wax ka dhiga dugsiyada…

-1984kii bishii 11aad waxay Ciidamada SNM dib u abaabuleen dagaal balaadhan oo ay faqsh ku jebiyeen hub badana ka furteen dagaalkaas oo ay SNM isku baahisey dhamaan Gobolada Somaliland wuxuu mujaahid Doolaal qayb ka haa Dagaalkii aaga Dhexe ee Shiikh halkaasna ay ka soo hooyeen Guul lama ilaawaana Ciidamadii uu ka mid ahaa ee SNM .

-Sannadkii 1984kii waxaa sii xoogaystay awoodii SNM markii uu ururka kusoo biiray Cali wardhiigle(alle hawnaxariisto wuxuu ahaa master minded of USC) oo noqday xogahaya ururka markii Guddoomiyaha loodoortay Ahmed Mohamed Siilaanyo(formed Somalind minster of planing).

- Bishii Ogoost 1984kii ayaa, Shirweynihii 4aad ee SNM uu ku qabsoomay magaalada Jijiga..
- 1984 bishii Novembar Waxaa dhamaan gobolada woqooyi (Somaliland iminka) lagu soo rogay bandoo.

- Hargeysa (17 Nov.1984): Waxaa lagu toogtay 37 qof oo Ismaaciil Sh..IBraahin Sh.Muuse iyo Cabdilaahi Cabdi Good Hargeysa lagaga daray ,halka inta kale laga soo qabqabtay Buuraha.

- Burco(20 Disambar 1984) :
Waxaa la soo qabqabtay tiro ah 40 qof halka 32 ka mid ah ay maxkamadu dil toogasho ku xukuntay oo 20 ka mid ahaa la toogtay

- Sheekh (19 Nov.1984)
Waxaa la soo ururiyey 11 qof oo dhamaantood la toogtay

- Bishii August 1984 ayaa wax qabsoomay Shirweynihii afraad ee Ururka Dhaqdhaqaaqa Wadaniga Soomaaliyeed [SNM]. Waxaa xilka gudoomiyenimada waqtigaa u sharaxnaa Xasan Aadan Wadaaddiid(Ihun), Sh Yuusuf Sh.Cali Sh.Madar(Ihun) iyo Axmed Maxamed Maxamuud (siilaanyo).Iyadoo la tixgalinayo duruufaha shirka ku xeersanaa iyo marxalado xasaasi ah oo ururku ku sugnaa waqtigaa ayaa lagu kalifay in ay ka tanaasulaan musharaxnimada gudoomiyaha ururka Xasan Aadan iyo Sh.Yuusuf. Waxaana musharaxnimadii kali ku soo hadhay Axmed Siilaanyo(Last Man Standing) loona dooratay gudoomiyaha SNM .

Bahda Mareegta Farshaxan
Oktoobar 17, 2009

Gunaanad:

Bahda Mareegta Farshaxan
Oktoobar 17, 2009

Waxaan qoraalkan ku soo gabagabaynaynaa sooyaalka mujaahidiinta in la ururiyo gar bay u leeyihiin dalka iyo dadkaanay faa'iido badan u leedahay .Sh.Aadan X.Maxamuud "Sh.Aadan Siiro" oo arintaa ka hadlayeyna wuxuu yidhi:"Ma lihi mujaahidiintii dalka u soo dagaallamay waxay ahaayeen sidii mujaahidiintii saxaabadii, qaar ay diintu ku qalloocatay ayaa odhan doona Aadan [Siiro] waxa uu yidhi, Lixle iyo Kood-buur waxay ahaayeen mujaahidiintii saxaabada kuma lihi ee waxay ahaayeen dad ujeeddo leh oo ummad xoreeyey waxayna xaqiijiyeen oo naftoodii iyo maalkoodii bixiyey una huray dadkoodana ka mudan in la qiimeeyo, in la daryeelo, in taariikhdooda gidaar walba lagu xardho, taas oo aannu dabooli karin nin maanta joogaa ha noqdo Madaxweyne, ama wasiir ha noqdo ama ka dambe ee imanaya ha noqdee. Walaalayaal, ma yeelayno, mana oggolaanayno, ummadnimadeennuna jiri mayso. Markaan leeyahay Somaliland wax ka sokeeyaa ma jiro ama qabiil kama jiro macnaheedu maaha taariikhdii SNM ha la baabiiyo, taariikhda SNM way sugnaanaysaa oo waa tii Somaliland dhashay, waa in la adkeeyo waa ummadnimadeenna iyo wixii aynu u soo burburnay taariikhdeeda sugideedu."

Berigii uu Mujaahid Lixle shahiiday (Illahay ha u naxariiste), ayaa Muj. Ahmed Silanyo la weydiiyey cida buuxin doonta garabka weyn ee uu shahiidkaasi inagu baneeyey, waxaanu ugu jawaabay, in SNM ay maanta Muj. Lixle wada yihiin oo ay joogaan kuwii uu soo tababaray ama tabaha ka bartay ama kuwii dagaal yiqiiney ee ka garab dagaalami jiray.

Halgankii SNM Waadadnimo, Hadaf Ka Oognaaye
Waa Himilo Taariikh Huwaday, Lama Hilmaamaane
Halas iyo Dhib Baa Loo Dhex Galay, Holac Rasaaseede
Harraad iyo Dhib Baa Laga Mutiyo, Holan Dharaareede
Hanfi iyo Cadceed Buu Lahaa, Heegan Joogto Ahe
Hayaan iyo Jid Dheer Baa La Maray, Habaq Lihiisiiye
Haybsigiisa Muddaa Lagu Maqnaa, Loo Habeen Dhaxaye
Hawd iyo Dhir Baa Loo Dhex Galay, Meel Hareeriya e
Sida Habar Dugaag Baa Kobaha, Loo Huluushadaye
Hogag iyo Dhufays Baa Dermiyo, Hoy La Dhaafsadaye
Hayinkii La Rarayaa La Qalay, Hirashadiisiiye
Hanti iyo Adduun Baa Ku Lumay, (Aan) Hadalku Koobayne
Haween iyo Carruur Baa u Qaday, Libinta Hoobaane
Halgankii Qadhaadhaa Jidkii, Lagu Halaakoobay
Hanbalyiyo Abaal Marin Halkaan, Higil Ka Dhawraayey
Hog-seeg Inaad Ku Sheegtiyo Inaad, Hadur Ka Soo Qaaddo
Waa Kuu Halhays Xumo Inaad, Dib u Hilmaantaane
Ku Hagoogta Taariikhda Waa, lagu Hal-maalaaye!!!
HAL-MAAL" Maxamed Cali Cartan "Haldeeq", 07/02/2008.

Garaad ku hayn:

Bahda Mareegta Farshaxan
Oktoobar 17, 2009

Waxaa jira gu'yaal mudan in aad loo sugo sooyaalkooda, taariikhda Somalilandna ku leh raad aan gaboobayn ayna ka mid yihiin :

1- 1984kii iyo 1987kii Xilligiyadii ugu geerida badnayd saraakiishii halganka :

1984 : Mujaahidiinta shahiiday waxaa ka mid ahaa Maxamed Mooge Liibaan, Aadan Shiine, Mujaahid Lixle, Ismaaciil Guuleed, Aadan Cali Guuleed, Daa'uud Axmed Cali, Maxamed Qawdhan, Xassan Beyleh, Cawil Aadan, iwm
1987: Mujaahidiinta shahiiday waxaa ka mid ahaa Cabdu Qaadir Koosaar, Aden Shiine

2- February 20,1982 iyo September 12, 2009
Labadii xilli ee kacdoon xaq u dirir ah ooy ardey hogaaminayso soo maray dalka Somaliland mid walbana waxaa ku dhintay Barre Xaji Cilmi (arday) iyo Qawdhan Cabaas ,halka kii danbena ay ku dhinteen Siciid Saxardiid Mataan iyo Siciid Cumar Macalin. Ilaahay ha u naxariisto iyaga iyo intii gardaro garab og darted u shahiidayba

Guud ahaanba intii SNM jirtay waxay yeelatay 5 guddoomiye oo u kala danbeeyey maamulka .Waxaanay kala ahaayeen:

Mujaahid Axmed Jimcaale Guuleed (Allah Yarxam)

Mujaahid Sh Yuusuf Sh Cali Sh Madar (Allah Yarxam)

Mujaahid C/qaadir Koosaar (Allaah Yarxam)

Mujaahid Axmed Maxamed Siilaanyo

Mujaahid C/raxmaan Axmed Cali (Alah ha naxariisto).

Tixraac:

- Qolka Kaydka ee Mareegta Farshaxan.

- Milicsiga Maalmihii
CABDIRAXMAAN "TUUR"..
Mujaahid Boobe Yuusuf Ducaale

-Barnaamijkii Somaliya iyo qarnigii tagey
Daadihiye :Aadan Nuux Dhuule

-Wareysi: Rashiid Sh. Cabdilaahi "Rashiid gadhweyne".
Bahda Mareegta Farshaxan

-Wareysi: Cabdiraxmaan Cawl "Cabdiraxmaan Baqdaadi".
Bahda Mareegta Farshaxan

-Wareysi: CabdiSalaan Turki .
Bahda Mareegta Farshaxan

-Wareysi: Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo.
Bahda Mareegta Farshaxan

-Wareysi: Maxamud Maxamed Liibaan.
Bahda Mareegta Farshaxan

-Wareysi Mujaahid Cabsiiye Maxamed Cabdilaahi Cabsiiye.
Cabdilaahi Cakuse (Wargeyska Saxansaxo)

-Wareysi: Mujaahid Faarax Yuusuf Nuur, (Faarax Xadhige).
QaadeNaasir X.Ciise (Ina geel jire)

-Qoraal : Aasaaskii Jabhada Afraad
Cali Cumar xasan

-Qoraal : Dhacdooyin ku saabsan halgankii ururkii
Dhaqdhaqaaqa Wadaniga Soomaaliyeed
(S.N.M.).
Cabdiraxmaan Cawl (Baqdaadi)

-Mareegaha:
Halgannews.com, Hadhwanaagnews.com, Gabileynews.com,
Ramaasnews.com, Oodweynenews.com, Somaliland.org, Golisnews.com,
Sooyaal.com,Radiosomaliland.com.